# Sahankii Richard Burton ee Bariga Afrika

## Cutubkii 8

## Tobankii Maalmood ee Harar

**Tarjume & Tifatitre Boodhari Warsame**

**Sebtember 15, 2016**

---

Saacad barkeed markii aannu iridda ku sugaynnay ayuu waardiyihii soo laabtay oo noo sheegay in aan soo dhaafo albaabka. Markaa ayaannu inta dib u kooraysannay baqalaheennii ku soo hagay waddada wayn, dhabbe dhuuban oo taag sare kor ugu baxa, dhagaxyada ka soo taagtaaganina ay ka badanyihiin rastadii Perote[1]. Guuleed Dheere wuxuu daabbaddiisii u dhiibay laba badawi. Ilaa nala qaabbilay se ma ayan iman, markaa oo ay noo sheegeen in dadka iridda joogaa ay kula taliyeen in ay bal neefafka la cararaan, illeen kuwii lahaa balo ayaa sugaysa e.



Haddii 100 yaardi loo soo jirsaday albaab bal haruur laga sameeyay oo dhanka fadhiga Amiirka St. James[2] tan Africa u furma ayuu horwadahayagii, nin indho gudguduudan oo waji macbuus hadal kulul ah, noo tilmaamay in aannu deganno, maadaamaa aanu midkayana af Hararigiisa fahmayn. Sidii ayaannu yeelnay. Dabadeed wuxuu bilaabay orod rucle ah, isaga oo ku gurxamay, sida ka muuqatay, in aan annaguna sidaa yeelno. Waa is fiirinnay, Xammaalina wuxuu ku dhaartay in uu si xun u dhimanayo intii uu kan ka amarqaadan lahaa, aniguna sidaa ayaan ku raacay. Gacaliye L[umsdenow], bal suurayso xaaji khamiis gashan oo gar iyo cimaamad ku karaamaysanoo "laba!" dhaadheer u kala jaban. Annaga oo gammaankayagii aayar u hoggaansanaynna, si kasta oo uu horwaduhu isu xammeeyaba, ayaannu iriddii galnay, oo daaraddii waynayd xarrago u sii taltallaabsannay geed geeska bidix ku yaal kuna dhow dhisme gaaban oo dhagax adag ka dhisan. Qalawqalowda joogtada ah ee seetooyinka silsiladaha ah ka yeerayay ayaa calaamad u ahayd in xabsi dawladeed hoosti nala geeyay.

---

[1] Magaalo qarnigii 18$^{aad}$ Isbayn qalcad caan ah (Fortaleza de San Carlos) ka dhisatay. Waa degmo waagan ka tirsan gobolka Veracruz ee dalka Mexico. – *[T]*

[2] St James's Palace (Wesminster, London): waa qasrigii ugu mudnaa fadhiga Boqortooyada Ingiriiska. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Daaradda qaybteedaan waxaa ka buuxay Oromo qaar dangiigaan qaarna kadaloobaan hooska gidaarka qasriga. Garaadyada waxaa lagu garanayay sindiyahooda maarta ah ee qoolaabyo dhuudhuuban oo isku dheggan cumaacunta laga soo bilaabo ilaa suxulka ku dhowaadkiisa taxan. Dhammaantood waxay u bogsanayayeen madaxnimadooda. Waxay iyaga oo sita warmahoodii dhaadheeraa faygamuuroodiina illan saaxadda Amiirka hadba dhinac u taxaashayeen. Dib u dhac nus saac ah, intii hawlaha dawladeed la kala agaasimayay, ayaa wuxuu i siiyay waqti aan ku indha'indheeyo qasri sheekooyin badan oo kala duwan laga wariyo. Qasrigu, sida Clapperton[3] uu u qeexo qasriga Suldaanka Fellataha, waa balbalo xun, hal fooq (sar) oo dheer, mooro aan dariishado lahayn oo dhagax qallafsan iyo dhoobo guduud ka samaysan. Wax kale oo calaamad garaaddo muujisanaysa ahna aan lagu arag, marka laga reebo nuurad yar oo albaabka dushiisa lagu xardhay.

Tani waa calaamadda wasiirnimada dawladeed ee Harar, meel nin aan madax ahayni aanu guriga nuuradaysan karin. Daaradda xukunku waxay le’egtahay qiyaastii 8 yaardi oo dherer ah iyo 30 ballac ah oo si aan is la’ekayn loo dhigay, guryo gaagaabanina ku hareeraysanyihiin. Bartamuha, halka iridda hore ka soo horjeeda, waxaa ku yiil dhisme wareegsan oo ay albaabbo badan oo kala jaad ahi ku tiirtiirsanyihiin[4]. Haatan horwadihii indhaha gudguduudnaa ee hadalka kululaa ayaa dib u soo noqday, dhallinyaro nagu soo qamaamtayna dhibkooda na dhaafiyay oo naga fujiyay. Dabadeed waxa uu noo ishaaray in aan kabahayaga ku bixinno xatabad dhagax ah, ama aan iraahdee, xariiq 12 cagood gidaarka qasriga u jirta. Waxaan ku ganuunacnay in aannaan masjid gelayn, nala ka ma se siisan taa. Dabadeed, dood dheer oo afaf aan is fahmayn dhex taal kuna saabsan in aan hubkayaga dhiibno ayaa xigtay. Madax'adayg ayaan kula harnay toorriyahayagii iyo baastooladdaydii wareegalayda ahayad. Horwadihii daah albaabhalkan ah ayuu fayday oo hore u yara foorarsaday, aniguna sidaa ayaan ku horistaagay amiirkii lagu dhici waaway.

[3] Hugh Clapperton, waa dalmarkii qoray *From Kano to Sokoto* oo ka mid ah buugga *Narrative Travels and Discoveries in Nothern and Central Africa 1822-4.* Kano iyo Sokoto labadu ba waxay ahaayeen boqortooyin Waqooyiga Africa ka taliya, Nayjeeriyada maanta iyo agagaarkeeda. – [*GW*] *[T]*

[4] Mar dambe ayaan ogaaday in marka nin dawladda looga yeero oo uu iska dhegatiro albaaabka gurigiisa la soo fujiyo oo daaradda dawladda la geeyo maalinta hore, maalinta labaadna dawladdu la wareego.- *[B]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**



**Axmed Bin Abibakar, Amiirka Harar**

Amiirku, ama sida uu isu yaqaanno, Suldaan Axmad ina Suldaan Abii Bakar, wuxuu fadhiyay qol mugdi ah, darbiyo cadcad, oo ay sursuranaayeen waxyaabo qurxin yaab leh ah. Waa qoryo kabriidleyaal[5] maaraystay ah iyo seetooyin silsilado ah oo la dhalaaliyay. Muuqaalkiisu wuxuu u ekaa Raaj yar oo Hindi ah, dhallinyaro 24 ilaa 25 jir hagaas ku ah, sulub gar khafiif ah leh, midabka hurdi, sunniyo duuduuban iyo indho buurbuuranna leh. Wuxuu ku labbisnaa kurdad dheer oo maro cas oo xorta dhogor xay cad ah ku leh iyo duub cad oo dhuuban oo dhinacyada koofiyad cas oo yuuban madaxa si adag lagu la duubay, sida koofiyad Turkishkii hore ee ee rinjiilayaashayadu xirtaan. Kursigiisu wuxuu ahaa kan caadiga ah ee hindiga, ama jiimbaar kor loo qaaday oo ilaa shan cagood dherer jeedda, gadaal iyo dhinacyadana ay ka hayaan udbo cilinno ah. Maadaama uu jirroole yahay; barkin ayaa xusulku ugu mudnaa ay hoosteeda ka muuqatay seef Hindi. Waxaa laba saf oo Amiirka dhinac yaal taagan ‘maqaawiirtii’ saldanada, ina'adeerradi iyo eheladiisii ugu dhawayd oo sida qaabka Xabashida gacmaha midigi ugu qaawananyihiin. Qolkii ayaa waxaan la galay, anigoo ku dheeraysanaya, ‘Assalaamu calaykum!’, taasoo uu H. H.[6] uu si wanaagsan uga jawaabay, oo inta qacan qalfoof hurdi ah oo aad mooddo addin galayr soo taagay suulka iyo fardhexada ka dhaabaaleeyay. Laba adeege ayaa markaa inta hore u soo tallaabsaday oo labada gacmood xaggooda hore i qabtay, si ay hoos iigu dugaan, iyaga oo igu hagaya in aan gacanta ka dhunkado. Hase yeeshee ma aanan dhunkan, maxaa yeelay iga ma daadegayso in aan sidaa gacan aan mid haweeneey ahayn u yeelo. Labadaydii adeege ayaa markooda ku kaltamay, oo iyagu markii ay jirjirka gacanta ka dhunkadeen ayaa calaacashana loo rogay, si iyadana u dhunkadaan[7].

---

[5] Kabriidle waa buntukh shucayska ka dambeeyay oo marka la ridayo dubaalad dun maleegan ah kabriid loogu qabto. – *[T]*

[6] *His Highness* ayay u taagantahay, waxay u dhigantaa ’sarreeye’ waxaana lagu yiraahdaa boqorrada iwm.

[7] Waxa ay aad ugu badantahay in uu isaguna dhunkaday oo waliba ku celceliyay. Sababta oo ah diidmada dhunkashada gacanta amiirku waxay ahaan lahayd dagaal bilowgii, haddii judha horeba la is qabtana u ma eka in uu geedo dambe calalin lahaa. Midda kale, Soomaaliduna ma yeesheen haddii isaga oo ay ka


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Markii hordhacyadaasi dhammaadeen ayaa nala fariisiyay derin Amiirkii oo markan waji suuroonaya iyo indho fagiigan na soo aaddiyay hortiisa taal. Amiirka caafimaadkiisa ayaa la warsaday, isaguna inta madaxa si ka-biyadiid ah u ruxay ayuu warsaday waxa muraadkeennu ahaa. Warqaddaydi ayaan jeebka ka soo dhuftay, dabadeedna adeege ayaa inta go'a la hullaabtay Amiirka u sii qaaday. Inta wax yar dammooday oo kursiga saaray ayuu faahfaahin dheeraad ah dalbaday. Dabadeed, af Carabi ayaan ugu sheegay in aannu Cadan ka nimi annaga oo salaan ka sidna Dawladdayadii, Hararna u nimi in aan Sarreeyaha jaahiisa aragno. Warkaa waxaa lagu dhammeeyay khudbad yar oo isbeddelka Wakiillada Siyaasadeed ee Carabiya iyo dulmar ku saabsan xiriirkii hore Ingiriiska iyo Amiir Abii Bakarkii xijaabtay uga dhexayn jiray. Amiirkii si wanaagsan ayuu u dhoollacaddeeyay. Dhoollacaddayntan waan in aan iraahdaa, gacaliye L[umsdenow], waxay ahayd mid aan laabta qaboojin.

Waxaan diyaar u ahayn tii ugu xumayd, qasriga xaalkiisu siduu ahaana sinna ba la isu ma dhigan karin. Wasiirkiisii maaliyadda, nin gaaban, fool xun, si qaab daran madaxu ugu xiiranyahay, qamaajuur ah, san bagafsan, oo indho caraysan iyo gar yuquf ah leh inta la faqay ayuu noo ishaaray in aan iska tagno. Gacmo dhundhunkashadii ayaa lagu celiyay mar kale, qolkii martidana waji fiican ayaannu ka la tagnay. Sida laga wariyo faan waynihii Bruce[8] ahaa, “qasriga boqortooyada Iglan iyo midda Xabashidu habdhaqankoodu waa isku mid.” Kuwii daaradaha qasriga Harar dhoobnaa ee markii indhaha naga dusinayay hadda waa dhoollacaddeeyeen, sidii ay na jecelyihiin. Iyada oo uu waardiyihii na horkacayo ayaan dhismihii ka soo baxnay, oo markii aan ilaa 100 yaardi soconnay soo galnay qasrigii labaad ee Amiirka. Halkaa ayaa nala ku yiri waa gurigiinnii. Halkaa waxaan ugu tagnay Badawidii oo iyagoo u qaadan la' in aan wali noolnahay kal iyo laab ka muusooday. Dabadeed jikadii Amiirka ayaa waxaa na loo ka keenay aqool Shabta ah – soor haruur ah oo karuur lagu iidaamay, basbaas guduudka oo milixii carrigan gudahaa ahna si daran loogu bilbilay. Cunnadii ayaannu cunnay. Dabadeed khasnajigii ayaa soo laabtay, isagoo Amiirka ka sida amar ah in aan booqanno Wasiirkiisa Garaad Maxamad ah. Hadba dhan u socodkayagii ayaannu dib ugu laabannay oo soo galnay guri kuwa kale lagaga garto daliigtiisa nuuradda ah ee kore, annaga oo uga sii gudubnay qol yar oo fooqa hoose ku yaal, si fiican loo nuuraddeeyay, laguna qurxiyay koobab geedo laga qoray oo mugag kala duwan leh. Waa uun tabtii jiko Ingiriis. Waxaan ugu tagnay nin oday laga haybaysto ah oo karaamada ka muuqataa ay beeninayso wararka ka yaal dhulkii Soomaaliyeed[9]. Isaga oo kor u hinqanaya, in kasta oo

---

amarqaadanayeenba marka hore diiday. Waxaa sii dheer oo u marag ah markii hore ee uu diiday in uu kabaha bixiyo looga ma harin ee sandulle ayaa loogu dirqiyay. Waxaa afkiisa soo mari la’i waa in isaga oo nin Biritish dunidoo dhan calanku u taaganyahay ah uu qoro in uu Amiir Afrikaan ah inta kabaha la baxay oo uu waliba foorarsaday uu haddana gacanta ka dhunkaday. *[T]*

[8] James Bruce, dalmarkii Xabasha tegay waayo sii horreeyay. Meel kale ayaynnu ku aragnay xogtiisa. [T]

[9] Todoba sano ka hor ayaa Xaaji Sharma’arkaha Saylac safiirkiisii Harar u doortay Xaaji Janitay, mid ka mid ah askarta Amiirka. Markii ninkani dhintay ayuu Sharma’arke wiilashiisii wayddiiyay waxa ku dhacay. Berbera ayay ku ballanqaadeen in ay u soo sheegi doonaan, laakiin markii ay Harar ku soo noqdeen ayuu, sida la rumaysanyahay, Garaad Maxamad ku qalqaaliyay in ay ballantii ka baxaan. Sidaa markii ay dhacday ayaa mid ka mid ah Sharma’arke saaxibbadi iyo qaraabadiisii oo uu diradiray Soomaali Xusseen la yiraahdo oo sannado badan Harar ku noolaa ay warqad cay ah u soo direen Garaadka. Warqaddu waxay ku bilaabanaysay ” Nabadgelyo iyo naxariista Eebbe korkaaga ma ahaato, kawaanleyahow kawaanluhu dhalay! Iwm!”, gebagebaduna waxay ahayd in ay suuqa dhexdiisa garbaduu ugu xiri doonaan si rag loogu digo. Xusseen warqaddii ayuu qaaday. Markii hore argagax ayay dhalisay, markiise weerar daba jooga la waayay ayuu Amiir Abii Bakar xabsiga dhigay Soomaaligii caaqa ahaa ilaa uu ka geeriyooday. Sharma’arke si aarsi ah ayuu ku


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

wajigiisa duuduubmay ay ka muuqatay in ay dhib ku tahay, ayuu dhinaciisa kursi dheer i fariisiyay. Halkaa waxaa u yiil qalabkii shaqadiisa; qalimmo, khad iyo looxyo cad cad oo uu warqad ahaan u adeegsado. Si xushmad leh ayuu ii soo dhoweeyay oo isagoo garkiisa baftada cad ah salaaxaya Carabi wanaagsan igu wayddiiyay muraadkayga.

Erayadii aan Amiirka ku iri uun baan ugu jawaabay. Si ay ahaata ba se, waxaan ugu daray xoogaa faahfaahin ah oo ku saabsan sidii waayo hore Madar Faarax uu Suldaankii xijaabtay ee Abii Bakar ahaa hadiyad ugu dhiibay barasaadbka Cadan, dadkeennuna ay doonayaan in xiriirradii saaxiibtinimo iyo isu socodka ganacsi ay Harar dib u la soo ceshadaan. "Khayr, Ilaah idanki!" ayuu la soo booday Garaadkii. Dabadeed, inta gacantiisa u foorarsaday[10] ayaan ka tegay. Markii aan soo laabtay ayaan khasnajigii warsaday waxa ku dhacay hubkii adeegayaashayda oo aan wali loo soo celin, waxaana la iigu laabqaboojiyay in la dhigay maqaasiinnada kii ugu ammaansanaa, waa qasriga e. Dabadeed lixlay wareegalay[11] caadi ah ayaan u sii dhiibay Amiirka, aniga oo u sharraxay kaan u sii dhiibay sida loo adeegsado. Dabadeed si wanaagsan ayaannu intii la karo u degnay oo salka dhigannay. Gudaha gurigayagu wuxuu ahaa nadiif ay darbiyadiisu salaaxanyihiin sagxadduna kabbis adag tahay. Ka soo horjeedka albaabka ee muska ah waxaa yiil laba sariirood oo balballaaran, ilaa laba cagood dhulka kor uga kacsan, yaardina dhulka ka sarreeya, oo lagu goglay dermo adag. Barkimihii weheliyeyaashaydu salsaarka kooraha u adeegsanayeen ayaan anigu sariir kaga xeeladystay rakadii kore. Markii aan hubsaday in gammaankii la quudshay oo la qoofalay ayaan dhinaca dhulka dhigay, aniga oo daal la il daran aadna ugu bogsanaa sugaanta meesha aan naal. Waa amiir cunsuri ah oo eraygiisa ugu yari geeri yahay, waxaan ku dhex jiraa dad ajaanibta neceb, waxaan ahay Yurubiga kaliya ee iridahooda la ma galaanka ah soo dhaafay iyo kii loo qoray in uu aakhirka iyaga halligo.

Hadda aan galo in aan Harar oo aan la aqoon wax ka iraahdo.
Waa magaalamadaxdii hore ee Hadiya, dadka degaa ay "Harar Gay" isku magacaabaan, Soomaalidu "Adari" u taqaan, Oromadu "Adaray" tiraahdo, Carabta iyo annaguna "Harar" niraahno. Waxay sida abbaartaydu sheegayso dhacdaa kob 220° Koofur Galbeed iyo 175 mayl Saylac u jirta, Berberana 257° Galbeed iyo 219 mayl ayay u jirtaa. Qiyaastani waxay ku dhacaysaa meel ku beegan 9° 20´ loolka Waqooyi iyo 42° dhigta Bari[12]. Beeggu wuxuu tilmaamayay taag qiyaasta badda ka sarraysa 5,500 oo cagood. Meesha ay ku taal waa degaandegga buur aayar bari isu kala rogta. Dhanka bari waa beero la fasho, dhanka galbeed xatabado beero ah ayaa laga beeray, waqooyigu waa kur qabuuro waranyihiin, xagga koofureedna magaaladu waxay u hoobataa dooxo hoose oo gubad buuralay ahi dhexda ka kala

qalqaaliyay Alu [Haile Melakot? (noolaa 1824 – 9 November 1855, xukunka hayay 1847-1855) , wiilkii Boqor Sahlah Salaseh [Sahle Selassie ( noolaa 1795 – 1847, xukunka hayay 1813–1847)], Boqorkii Showa in uu xirxiro dadka reer Harar ee dhulka uu ka taliyo ku nool oo uu ilaa laba sano xabsiga ku hayo. Amiir Abii Bakar waxaa la sheegay in markii uu sii dhimanayay uu wiilka uga digay Garaadka. Markii Axmad Saylac u soo weriyay geerida aabbihi, Xaaji Sharma'arke Mawliid [tacsi?] wayn ayuu amray si marxuumka loo xuso. Ilaa waagaa, si ay ahaataba, xiriirku waa yaraa, saaxiibtinimona dhexdooda ma ool. *[B]*.

[10] Waa dhunkaday! La soco, Wasiirku waa Soomaali! *[T]*.

[11] Bastoolad khasnaddeedu wareegto oo lix xabbadood qaadda. – *[T]*

[12] Dhig iyo Lool asal ahaan waxay ka mid yihiin qalabka dhismaha Aqal Soomaaliga. Raarka ayay ka hooseeyaan oo qalfoof celiya u yihiin. Marka juquraafiga loo adeegsado, waa xarriiqaha kubadda caalamka korkeeda ku saaban ee is jarjara. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

jaro. Meeshaan kala dheer waxaa dabaysha ka dugsiiya, gaar ahaan dhanka waqooyi, silsiladda Kondura ay ka mid tahay figta qurxoon ee uga sarraysa. Waa sida gabyaaga reer Beershiya uu ugu heeso magaaladii samada laga jeclaa e,'kulkeedu kulayl ma aha, qabowgeeduna gabadano ma laha.' Intii yarayd ee aan joogay, hawadu waxay i soo xusuusinaysay carrasankii Tuscany. Galabnimadii Jannaayo 11 ahayd, onkod roob weheliyo ayaa dhacay, maalintii xigtay shuux is daba joog ah ayaa da'ay, subaxii saddexaadna roobkii waa qaaday. Se markii aannu buuraha ka gudubnay, daruuro madow oo cukan ayaa cirka qariyay. Maansuunku aad ayuu bil diraacda ka mid ah u culusyahay. Sidaa awgeed, inta aysan bilaaban ayaa dalagyada la sii beeraa, bilaha Diseembar iyo Jannaayana waa la goostaa. Xilliyada kale hawadu waa qallayl dhexdhexaad isu dheellitiran ah. Degmada Hadiya waxa uu Makrizi[13] ku sheegay in ay tahay mid ka mid ah todobada[14] magaalo ee Imbaraadooriyaddii Saylac ee ay dhidibada u taageen Carab soogalootiga ahayd oo qarnigii 7[aad] ee Miilaaddiyada qabsaday oo gumaystay dhulka hoose ee u dhaxeeya Badda Cas iyo Buuralayda. Muslinka Harar saamayn wayn ayay ku lahayd Xabashida Masiixiga ah. Raaciyaddii Imbaraadoorradii Xabashidu ka haysteen Awdal, Canfartii iyo Soomaalidii hore waa hore ayay faraha ka baxday, Muslimiinta aan la xakamayn karinna waxaa lagu laaluushi jiray xoolo fara badan, marka ay damcaan in boqortooyada Masiixiga booqdaan. Xabashidu reer Awdal waxay ku saadi jirtay addoommo, kuwa kalana waxay qiimaha ugu beddeli jireen fudad milix ah. Isdhaafsi ganacsi ayaa isku dan ka yeelay, dagaalna labada dadba dhaawac uun ayay ka dheefeen. Si ay ahaataba, reer gubanta hoose ee seeflaboodka ah oo diin fidin iyo bililiqo ay kaga dhegganthay ayaa kaniisado Masiixi gubay, gaaladii gumaaday, baadiriyadiina jirdilay, ilaa ay kiciyeen aano caradeedu darantahay.

Qarnigii 14[aad] (1312-14 C.D.) ayaa Amda Sion[15], Imbaraadoorkii Itoobiya, oo uu nafta u keenay Amano, Boqorkii Hadiya ee ku bannaanaa mid dumarka iyo ilmaha uun ka adag,ayaa gubanta hoose , laga soo bilaabo Tegulet ilaa Badda Cas cagta mariyay oo bililiqaystay. Axmaaradii waxaa la faray in aysan wax dhaqaaqa ka tegin. Markaa ayay, si ay uga jibo gaaraan. curraafi saadaalisay dhicidda Islaamka si walba uga badbadiyeen oo colaad ugu tiiqtiiqsadeen. Nabadi waxay timi uu markii Amda Siongeeriyooday. Waagii uu xukunka hayay Zera Yakub[16] ayuu dabkii dagaalka dib Hadiya uga huriyay amiir reer Saylac ah oo uu boqorka Itoobiya aflagaaddo u gaystay, markii uu foolashiisa wax ka sheegay. Ha se yeeshee, shaqaaqooyinkii ka dhacay ma ahayn kuwo sidaa u sii buuran. Boqorkii ku xigay, Baeda Mariam[17], noloshiisii wuxuu ku dhammaystay dagaal joogto ah oo uu u galay sidii uu Awdal u qabsan lahaa. Markii uu nafkadhawrka ahaa, wuxuu amray in wajigiisa loo jeediyo dhanka kuwaa gubanta hoose dega oo jabintooda uu ka galay tacab 10 sano ah oo aan waxba ka naasacaddaan.

---

[13] Taqiddiin Abulcabbaas Almaqrizi (1364-1442), waxa uu ahaa taariikhyahan iyo dalmare Carbeed. – *[T]*

[14] Lixda kale waxay ahaayeen Cifaat, Carabiini, Dawaaro, Sharkha, Baali iyo Darah. – *[B]*

[15] Amde Seyon (Tiirkii Sahyuun) wuxuu Itoobiya Imbaraadoor ka ahaa muddaadii u dhaxaysay 1314-1344, magaciisa darajada boqornimo waxaa la oran jiray Gebre Meskel (Addoonkii Saliibka). – *[T]*

[16] Zera Yacob / Zar'a Yai'qoob / Duudkii Yacquuq (1399-1468), waxa uu ahaa Imbaraaddoor Itoobiya ka talinayay intii u dhexaysay 1434-1468. Magaciisa boqortooyo waxaa la oran jiray Kwestantinos I / Constantine I . Badlay ina Sacaadaddiin II (Shihaabuddiin Axmad Badlay), suldaankii Awdal, ayuu sannadkii 1445 kaga adkaaday kuna dilay goobta caanka ahayd ee Gomit. – *[T]*

[17] Ba'ida Maryam I / "kii ku jiray Gacanta Maryama" (1448-1478), waa wiilkii Zar'a Ya'iqoob oo isaguna Imbaraaddoor Itoobiya ka taliya ahaa intii u dhexaysay 1468 ilaa 1478. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Dabayaaqadii qarnigii 15aad ayaa Maxfuud [amiirkii Awdal], Muslin cunsuri ah, nabar xun u gaystay Xabasha. Wuxuu ku dhaartay in sanad walba 40 ka beri ee Lent[18] uu ku dhammaysto gaalada deriska ah dhexdooda, waa waqtiga soon si adagi uu nugleeyo oo ayna hub qaadi karin e. Soddon sano oo xiriir ah ayuu kaniisado iyo macbadyo dab qabadsiinayay, si naxariis darro ah u dilay nin walba oo uu haleelo, carruurta iyo dumarkana addoonnimo u qafaashay oo addoonsadeyaal qalaad ka iibinayay, qaarna u hadiyaynayay Shariifyada Maka. Waxa uu laaluushay Za Selassie, abbaanduulihii ilaalada Imbaraaddoorka, wuxuuna sababay khaarajintii Alexander (1478-95 C.D.) lagu dilay caassimadii hore ee Tegulet. Na'od[19] kii ka dambeeyay guulo yar yar ayuu Muslimiinta ka gaaray. Biolowgii taliskii David III[20], wiilkii Na'od oo 11 sano oo qura jiray markii xukunka la saaray hooyadi Iteghe Helenana looga dhigay korjoogto, labada dhanba waxay heleen hub dagaal oo cusub.

Ka dib markii uu Masar iyo Carabiya uu qabsaday Selim I[21] (1516 C. D.), safarradii xujayda Jerusalem u socota ayaa la weeraray, dadka intii waawaynayd dhagtaa dhiigga loo daray, dhallinyardiina addoonsi ayaa loo qafaalay. Ganacsato badan oo Carab ah oo ka soo cararay cadaadiskii iyo caddaalad xumadii Turkiga ayaa dhanka kale ee xeebta Afrika u soo gudbay, halka Cismaaniyiintii ay qabsadeen Cadan ilaa Saylac oo aysan ganacsigii Hindiya kaliya maraakiibtooda dagaalku si xun u burburin kaliya ee ay sigeen in ay Xabashiya oo dhan baabi'yaan. Waxay taakuleeyeen oo dhiirrigeliyeen Maxfuud, si uu burburintiisii u sii wado, halka Shariifka Maka uu ku wareejiyay xukunkii Saylac uuna siiyay calanka Crusader[22] ee cagaaran.

Dhanka kale, Alburquerque[23] kii waynaa ayaa isla waagaa (1508-15 C.D.) waxa uu naa'ib ka ka ahaa Hindiya, isaga ayayna Itheghe Helena [Eleni][24] gargaar waydiisatay. Safiirkeedii wuxuu gaaray Goa[25], isaga oo sida falliir ka mid ah saliibkii saxda ahaa ee Masiix ku dul go'ay' oo hadiyad saaxiibtinmo ay Imbaraaddooradda Xabashidu ugu soo dirtay walaalkood

[18] Lent (Leent) waxaa la yiraahdaa muddo 40 maalmood ah oo ay Masiixiyiintu soomaan. Waa inta u dhexaysa labada munaasabood ee la kala yiraahdo Ash Wednesday iyo Easter. Masiixiyiinta Galbeed iyo kuwa Bari (Orthodox) ee Xabashida iyo Qibdiga reer Masar ay ka mid yihiin waa ku kala duwanyiin. Kuwan dambe kooda **Great Lent** ayaa la yiraahdaa, xilligu waa ka duwanyahay, qaabka soonkuna waa si gaar ah oo ka qallafsan kan hore. – *[T]*

[19] Imbaraaddoor Naa'uud. (Na'od) Xukunka hayay 1494 – 1508. [T]

[20] Dawit II (wiilkii Naa'uud) , loo yiqiin Lebna Dengel amaWanag Seged , noolaa 1501 – 1540, xukunka hayay 1508–1540. [T]

[21] Sultaan Saliim I, suldaankii Boqortooyadii Cismaaniyiinta Turkiya, loo yiqiin "Yavuz" (mayal adke), noolaa 1466 –1520, xukunka hayay 1512-1520. [T]

[22] Crusaders (Kuruuseedhars) waxaa asal ahaan la oran jiray Saliibiyiintii macangagga ahaa ee Yurubta galbeed ka soo duulay si ay Baytal Maqdis Muslimminta uga qabsadaan (1095 ilaa 1291 C.D.). Muddo dheer ayay haysteen dhulalkii ay qabsadeen ilaa waa dambe uu ka jafay Salaaxaddiin Al-Ayuubi. – *[T]*

[23] Afonso (Aphonso/Alfonso) de Albuquerque, Duke of Goa (1453 – 1515): waxa uu ahaa janan dagaalyahan taariikh dheer leh ah oo dhulal badan oo Goa (Hindiya, qaybtii Bortaqiisku gumeystay) ay ka mid ahayd u furtay dhulballaarsigii gumeysiga Isbayn. – *[T]*

[24] Eleni / Helena : waxay ahayd ooridii Zara Yakoub, Imbaraaddoorkii Xabasha xukumayay 1434–1468. Waxay ka dhalatay boqortooyadii Hadiya (Muslim) , markii ay Zara Yakoub guursatay ayay diinta beddelatay oo Masiixiyada qaadatay. Dabadeed, waxay noqotay qof siyaasadda boqortooyada Xabasha lug xoog leh ku yeelatay oo ilaa afar boqor isbeddelkood si fiican uga dhex muuqataty. - *[T]*

[25] Gobol Hindiya ka tirsan oo Boortaqiisku muddo gumaysan jiray. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Emanuel[26]. Taa waxaa xigay imaanshihii ay Masawac timi safaarad ka socota Boqorkii Bortuqaal.

Si ay ahaydba, isaga oo iska la wayn suggidda gargaar shisheeye ayuu David isaga oo 16 jir ah uu ruuxiisu goobta dagaalka Muslimiinta kaga hor yimi.
Goobtii la isku dhigay Maxfuud, Jaaluudkii kufaarta, hal iska horimaad ayuu Gabriel Andreas ku dilay,askari geessinimo loo daayay oo suufinnimo u go'ay, ka dib markii uu caaradda carrabkiisii ku waayay xorriyadda hadalka oo aan la oggolayn. Calankii cagaarnaa waa la qabsaday, muslimiintiina 12000 ayaa goobta la dhigay. David wuxuu sii dabagalay guushiisii, isaga oo weeraray gubanta hoose, aabayeel la'aanna warankiisii ula dhacay irdiha Boqorkii Awdal.

Harar, xilligii Maxamad Garang [ Axmad Gurey], Atilla[27]hii Awdal, waxay ahayd uun xoogaa degmooyin reer miyi dego ah. Markii uu helay calooshood'ushaqaystayaal laga keenay Mukha, Turkigii Yamaneedna uu ka helay koox jeniseeri[28] ah iyo madaafiida goobta oo aan kala go' lahayn ayuu Cifaat iyo Fatigar isku sii daayay. Sanadkii 1528 C.D. ayuu Showa qabsaday, Amxaaro cagta mariyay, kaniisadihii gubay, qaniimo aan la qiyaasi karinna ka helay. Duullaankii ku xigay waxa uu u suurageliyay in uu dayrtaa ku negaado Begemder. Sanadkii xigay Imbaraadoorkii David ayuu Tigre ku baacsaday, ilaa xudduudaha Sana'ar. Masiixiyintii ayuu dabadeed Wabiga Niil qarkiisa dagaal culus kula galay, gacantiisana ku dilay wadaadkii Gabriel ahaa oo xilligaa waayeel ahaa. Isaga oo ay xoojiyeen Gideon and Judith, boqorkii iyo boqoraddii Yuhuudda reer Samcaan ayna kaalmaysay abaar daran oo jilbaha dhulka ugu dhufatay wixii waran ka baxsaday ayuu gaboodfal nooc walba leh ku dhiiqsaday. Waa waagii uu qabsaday oo gubay Axum [Aksum], amiirradii dhaxalka boqortooyada lahaana ku laayay buurta Amba Geshe. Sannadkii 1540 C.D. ayuu dilay David III oo ahaa imbaraaddoorkii ugu dambeeyay ee qaatay cinwaanka 'Boqorka Boqorrada'[29].

Claudius[30] kii xukunka boqortooyada sii liicaysa la wareegay ayaa wuxuu safiir Yurub ugu diray nin Boortaqiis Xabasha ku xabbisnaa ahaa oo John Bermudez, isaga oo ballaanqaaday, sida la sheegay, in uu Boobka Rooma hoos tegi doono, dhulkiisa saddex meelood oo meel uu

[26] Manuel I (1469-1521): wuxuu ahaa boqorkii Bortaqiiska xukumayay, intii u dhexaysay 1495-1521. – *[T]*
[27] Atilla the Hun (Atilla reer Haan) wuxuu ahaa hogaamiyihii qabiilooyinkii Hun ee Yurub 434-453 C.D. Wuxuu ku caanbaxay geesinnimo aan gabbasho lahayn oo dawladdii Roomaanka Galbeed iyo Bari ka harsan wayday. Goobtii Catalaunian Plains ayaa 451 lagu jabiyay isaga iyo ciidammadiisii oo markaa rabay inay Faransa iyo Roomaankii Galbeed gacanta ku dhigaan. – *[T]*
[28] Ciidan gaar ah oo si heer sare ah u tababaran dhiirranaan iyo geesinnimana ku caan baxay goobaha dagaal. Suldaan Muraad I ayaa sannadkii 1383. Ragga ciidankaasi ka koobnaa badankoodu waxay asalka ahaayeen adoommo wiilal Yurub laga soo qafaalay ahaa. Ciidankaa waxaa sannadkii 1825 kala diray Suldaan Maxamuud II, ka dib markii gadood joogto ah iyo anshax xumo maaro looga waayay. – *[T]*
[29] Cinwaankaan dib ayaa loo soo nooleeyay xilli dambe, waxaana ugu dambeeyay boqor sheegta Haile Selassie oo xukunka afgembi looga tuuray sannadkii 1974. Cinwaankan waxaa qaadan karay boqorka awood ama xeelad ku muquuniya wixii boqor ama jago u dhiganta sheegta Xabasha oo dhan. Boqortooyadii Xabashida oo taariikhdeedu aad u fac wayntahay, waxay kale oo lahayd taariikh dheer oo ku saabsan boqorrada iyo loollankoodii oo badanaa aad u fool xumaa dagaallo iyo dhagaro la isku hoobtana lagu kala hari jiray. – *[T]*
[30] Gelawdewos, loo yiqiin Asnaf Sagad I (1522-1559), xukunka hayay 1540 – 1559, Dawit II walaalki. [T]


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

siisan doono xoojin ciidan. Amar uu bixiyay John III[31] darti ayay Don Stephen iyo Don Christopher, labadii wiil ee Don Vasco da Gama, Badda Cas la soo jibaaxeen sinjaar maraakiib dab xoog leh sita ah. Labada koodii yaraa ayaa inta Masawac kala soo degay 400 oo buntukhlay ah halkaa ku dilay barasaabkii Nuur ahaa, madaxiisiina u diray Gondar oo Iteghe Sabel Wengel[32] oo iyaduna ugu bishaaraysatay sidii calaamad bayaxownimo. Dabadeed, janankii Boqtaqiisku si aan caqli ku fadhin ayuu xilliigii maansuunka duulay, iyadoo isla markiiba ay banka Ballut foodda isku dareen [Axmad Garagne (Gurey)] iyo 10,000 oo waranlay ah oo gaan fardoolay ah weheshay. Dhanka kale waxaa ka soo jeeday baaba' Xabashi ah iyo koox yar oo geesiyo Bortuqiis ah oo uu hogaaminayeen askari kii ugu geessisanaa. Sida laga hayo Baadari Jerome Lobo, oo wixii dhacay goobjoogayaal ka maqlay, labada kabtan shir ayay yeesheen. Axmad oo degay meel weerarka ku habboon ayaa farriin u diray Don Christopher, isaga oo u sheegay in Xabashida dhagarta badani ay Boqorka Boortuqaal soo hodeen, iyada oo dhallinyaronimo loogu dhimrinayana loo oggolaan doono isaga iyo raggiisaba meel ammaan ah oo ay ka baxaan iyo saad ay dhulkoodii ku gaaraan. Kirishtaankii wuxuu safiirkii Muslinka u soo dhiibay maro qaali ah, jawaabtan geessinnimada lehna soo diray, 'in isaga iyo askartiisu ay u yimaadeen in Axmad ay ka saaraan dhulalkii uu gardarrada ku qabsaday, in taladiisu hadda ay tahay in intii sidii uu ku yimi ku noqon lahaa, sida Axxmad ku taliyay, uu isaga qudhiisu jid ka bannaysto dhulka cadawgiisa, in Axmad uu kala doorto in uu dagallaamo ama uu soo celiyo dhulalkii uu boolida ku qaatay intii uu talo isaga u soo jeedin lahaa, in uu taladiisa oo dhan saartay awoodda wayn ee Alle iyo xaqnimada uu ku socdo, iyo in si uu naxariista Maxammad sida uu ula dhacsanyahay uga jawaabo uu u soo dhiibay diirado iyo biinso [kalbad]'.

Jawaabtii iyo hadiyaddii carada ay ku dhalisay Boqorkii Awdal inta ay la'ekayd, waxa uu ka istaagay miiskii, si uu weerar ugu qaado ciidankii yaraa ee Boortaqiiska ahaa oo buur kayn dhinaceed ku tiil degaandeggeeda fadhiyay. Dushooda waxaa degganaa Xabashidii oo doortay in ay isha ka daawadaan goobta kii guushu raacdana ku biiraan. Axmad wuxuu gulufkii ku bilaabay toban fardooley ah oo qura, iyada oo in la mid ah oo Boortaqiis ah loo soo saaray. Tobankaasi, inta ay shiish wacnaan ka qabaan, sagaal Moor[33]kii ka mid ahaa ayaa dhulka dhacay, Boqorkiina waxaa lugta ka dhaawacay Peter de Sa. Isku yaacii ka dambeeyay ee gorodda la is daray, Muslimiintii ka fajacay jabka degdegga hore ah ee gaaray, waxaa dhakhso u jabshay banaatiikhdii iyo madaafiicdii Boortaqiiska, Axmmadna dirqi ayuu naftiisii ku badbaadiyay. Si ay ahaydba se, raggiisii ayuu ururtsaday oo dhufays adag ka qotay meel la yiraahdo Membret, isaga oo u dan lahaa in uu halkaa ku dayraysto oo hiil ku sugo.

Boortaqiiskii oo guul ka door bidayay hanti, waxay daba galeen cadawgoodii oo ay damceen in ay dhammaan go'doonshaan. Ha se yeeshee, markii ay dhufayskii geli waayeen ayay iyana dhufays ka galeen kur sare oo ka soo horjeedda. Saadkoodii maalin ba maalinta ka dambaysa ayuu isa sii dhimay, saaxiibbadoodii Masawac u ma soo gurman karin, si ay saad ku

---

[31] John III (xukun 1502-1557) oo ku magac dheeraa 'the Pious' wuxuu ahaa boqorkii 15^aad ee dalka Bortuqaal. Fidinta mad'habtiisa Kootaliga ka sokow, dano badan oo fidinta iyo gacankuhaynta ganacsiga ay Bortuqaal la lahayd dunida kale ayuu ka lahaa meelo ay ka mid ahaayeen Afrika iyo Aasiya. – *[T]*

[32] Gelawdewos hooyadi. [T]

[33] Magaca "Moor" waxaa reer Galbeedku u adeegsadaan dadka Berber-Carab-Afrikaanka ah ee Waqooyiga Africa dega. Waxay caan baxeen markii ay qabsadeen Jasiiralamoodda Ibeeriya oo ay Andalus ula baxeen (Isbayn iyo Boortuqaal), halkaa oo ay muddo 7 qarni ka badan ka talin jireen. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

qaraabtaan ma ayan aqoon, xulafadoodii Xabashida ahaydna isku ma ayan hallayn karin. Saa oo ay ahayd, qiiro iyo isku tiirin magangal Rabbaani ah awgeed, shaki ka ma galin in ay dhib oo dhan ka moosaan. Axmad ruuxiisu ma shiidaad yarayn. Amiirradii Muslimiinta ayuu gargaar ka dalbaday, isaga oo dareenkooda diineed kicinayana waxaa soo gaaray 2000 oo buntukhley Carbeed ah iyo saanad madaafiic ah oo Turkiga Yamaneed soo diray. Isaga oo uu hiilkaasi dhiirrigelay ayuu dabadeed dhufayskiisii ka baxay, si uu ugu galo kii Boortaqiiskii oo geessinimo tii ugu sarraysay inta kaga hor yimid raggiisii in badan laayay, weerarro badanna ku qaaday, in kasta oo iyagana ay khasaarooyin waawayni gaareen. Don Christopher durbaba xabbad ayaa gacanna jebisay jilibna cardaadiqaha ka dhigtay. Maantaa geesinimo ayaa aad uga sare martay ciidan badnaan. Dabadeed,cadawgii inta dhufayskii soo jiiray ayuu galay oo Kiristaankii birta ka aslay. Janankii Boortaqiisku 10 nin ayuu gawracii kala baxasaday oo kayn salka la galay, halkaa oo qayb cadawgii ahi ay ka heleen. Axmad oo farxadi ka badatay, markii uu cadaw kii ugu darraa gacanta ku dhigay ayuu Don Christopher ku amary in uu baxnaaniyo oo daweeyo adeerki iyo wiil uu adeer u yahay oo dhaawacmay, isaga oo u sheegay in naftoodu tiisa ku xirantahay, haddii ay dhintaanna uu isagu ku eedaysanyahay in uu dadajiyay. Boortaqiiskii wuxuu ku jawaabay in uu u yimid in uu Muslimiinta baaba'sho ee uusan u iman in uu naftooda badbaadiyo. Sida uu u hadlayo markii uu ka carooday, ayuu Axmad maxbuuskiisii dhadhaab madaxa ka la dhacay, askartiina jirdillo kala duwan oo isaguna uu si shahiidnimo leh ugu adkaysaty u gaysteen. Ugu dambayn, markii in uu muslimo, haddii uu rabo in uu Hindiya nolol kula noqdo loo soo jeediyayna, geesigii aad ayuu u carooday. Diidmo tii ugu sarraysay ayuu ku jawaabay, taa oo ahayd in aysan jirin wax ku kufrisiin kara Rabbiggiisa Sare si uu u raaco 'beenaale', oo haddana raaciyay in uu si daran u caawo 'Nabegii beenta ahaa' ilaa uu Axmad qoorta dhinac ka dhigay. Maydkii waa la jarjaray, waxaana loo kala diray meelo badan, se Kootalidii ayaa maydkii shahiidkooda isu ururshay oo xabaalay. Moor walba oo soo maraa dhagax ayuu dusha kaga tuuray muddo aan dheeraynna waxaa ka samaysmay taallo.

Baadari Lobo waa ay ku adkaatay in uu kala guro si uu lafahaa barakaysan u soo qufo[34]. Wuxuu cir'aanaysi aan lagu maagi karink ku yiri: ' Waxaa ka jirta carriga sheeko caado ah oo ku saabsan halkii Don Christopher madaxiisu ku dhacay in il mucjiso ah oo cudurro badan dawaysa ayaa ka soo burqatay'.

Axamad Garang [Gurey] wuxuu guushiisii ku sii xoojiyay in uu Claudius Xabasha ku dhex baacsado, iyada oo aan cidina u babac dhigi kari ciidamadiisa. Ugu dambayn, intii yarayd ee Boortaqiiska ka badbaadday ayaa Imbaraadoorkii Kiristaanka u cawday, dabadeedna waxaa lagu qanciyay in uu ciidan ku soo bixiyo Boqorkii Awdal. Iyaga oo ay ka go'nayd in ay janankoodii u aar gudaan, ayay codsadeen in laga dagaal geliyo halka ku aaddan Axmad, xooggoodii oo dhanna isugu geeyeen halkii uu Atillihii Muslinku ka dagallamayay. Dadkiisa ku diinta ahi wali waxay ka sheekeeyaan in markii Grange dhul dhacay ayarwadiisii, Talwambara, geesiyaddii ina Maxfuud, si ay uga hortagto googooyo iyo firdhin lagu la kaco

[34] Baadari Lopo waxaa laga soo diray Hindiya 1622, si uu u soo helo meeshii laguaaasay Don Christopher oo wixii ka haray lafihiisii u soo ururiyo. Isaga oo uu taageerayo Imbaraaddoorki Xabashidu wiil uu soddog u ahaa ayuu Lobo ciidan la dhex maray dhulka Oromada, soo helay shahiidka ilkihiisii iyo daankiisii hoose, gacmihiisii iyo sawir Maryama ah oo uusan dhigi jirin, Goa ayaa intaba loo soo gudbiyay […]. *[B]*.
Sharraxaaddani meeshan meel ka hooraysa ayay asalka ku tiil. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

hoggaamiyihii Islaamka, maydkii si qarsoodi ah u xabaashay oo booskiisii addoon ku beddeshay, si uu xeel dagaal ahaan isugu ekaysiiyo, inta meel nabad ah dib loogu guranayo madaxdiina ka ogaysiinayso.

Baadari Lobo si ka duwan ayuu u dhigay dhacdadaa. Sida isaga laga wariyo, Peter Leon, shiishyahan darajo yar se geesi ah oo kaaliye u ahaa Don Christopher ayaa Boqorkii Awdal goobta ka dhex calaamadsaday, oo isaga oo raggiisii dagaal gelinaya madaxa ka toogtay. Axamad cadawgiisii waa daba galeen, ilaa uu dhulka mayd ahaan ugu dhacay. Boortaqiiskii inta faraskiisii ka degay ayuu dhegaha middood ka goostay oo raggiisii dib ugu laabtay. Muslimiintii si xun ayaa loo jebiyay, hogaamiye Xabashi ah oo maydkii Guray dhulka ka helay ayaa dabadeed madaxii u hadiyeeyay Neguuska ama Imbaraadoorka, isaga oo sheegtay sharafta ah in uu isagu dilay cadawgii waddankiisa ugu darnaa. Peter oo aamus ku dhegaysanayay indha'adaygaas ayaa warsaday in boqorku hal dheg ah lahaa oo tii kale jeebkiisa ka soo dhuftay, Xabashigii oo yaabban[35]. Sidaa ayuu ku xijaabtay, 14 sano oo dagaal aan kala go' lahayn ah dabadood, geesigii Afrikaanka ahaa ee wixii 2500 oo sano la soo dhisayaya askaaxda ka yeelay. Sida 'Kardillan'kii Holy Land ayaa Axmad Gurey wali sheekooyin badan oo naxdin leh laga sheegaa, ilaa waaganna dadka reer Showa nacayb ayay u qabaan Muslimiinta gubanta hoose dega.

Axmad waxaa xukunka Awdal uga dambeeyay Amiir Nuur ina Maajid, sida dadka qaar sheegaanna, 'Gurey' walaalki ahaa. Talwambara ayuu guur ka dalbaday, iyada oo kaga yeeshay hal xujo ah oo ahayd in uu Imbaraaddoor Claudius madaxiisa cagaheeda soo dhigo. Sannadkii 1559 C.D. ayuu farriin ku barifur ah u diray Neguuska oo inta si mucjiso leh u badbaadiyay Xabasha dib u dhisayay Debra Work 'Buurta Dahabiga" ah, macbad aad loo jeclaa oo ay Muslimiintu gubeen. Claudius oo aan jeclayn qorrax madoobaadka oo curraafaystay, iyo bacawsiga [Turkiga] oo u weheliya soo duulidda cadawgiisa ayaa sidaa ku yeelay isu banbax dagaal. Maarso 22, 1559, iyada oo labadii ciidan ku dhowyihiin in ay is weeraraan ayuu wadaadkii ugu sarreeyay Debra Libanos Neguuskii u soo degdegay oo u sheegay in uu riyo ku arkay [Malagga] Jibriil oo uu ku amray Imbaraadoorka Itoobiya in uusan macna darro naftiisa u halligin. Xabashidii cir'aanayska badnayd dibadda ayay ku dhaceen, iyaga oo Claudius uga tegay in yar oo ciidan Boortaqiis ahaa. Iyagii dhakhso ayaa hareerihiisa loogu laayay, boqorkiina isaga oo dhaawacyo badan qaba goobtii la dhigay. Dabadeed Amiir Nuur madaxa ayuu ka soo gooyay oo Talwambara cagaheedii hoos dhigay, sidaana iyada oo ballantii fulinaysana ooridiisii ku noqotay. Amazontani waxay billaddii oo ay timaha ka xiirtay suratay laanta geed gurigeeda ka hor jeeda, si indhaheedu araggaa ugu doogsadaan. Laba sano markii uu meeshii surnaa ayaa waxaa ka iibsaday ganacsde Armenian ah oo ku duugay Kaniisadda way nmee St. Claudius [Wali Kalawdiyus] ee Antioch ku taal. Magaca geesigii Kiristaanka ee goob walba ku guulaystay, marka laga reebo tii uu ku dhintay, waxaa lagu daray diiwaanka dheer ee awliyada Xabasheed oo uu kaga jiro meel caan ah oo loo yaqaan wanjalihii Axamad Gurey.

Amiir Nuur isagana dadkiisii way xuseen, iyaga oo "Waligoodii" ay jeclaayeen ku xabaalay qubbi yar oo Masjid Jaamaca Harar agtiisa ah hoostiisa. Guushii uu Kiristaanka ka gaaray wax yar dabadeed ayuu darbiga hadda ku xeeran Harar ku wareejiyay . Waa dhacdo hadda

[35] Dhacdadaan sidii ay ahayd la ma hubo, ilaa waagan. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

sheeko xariirada Muslinka aad ugu baahday. Halyaygu wuxuu si joogto ah ula tashan jiray Al-Khizr[36]. Mar, isaga oo fadhiya dhagax wali lagu magacaabo Gay Humburti (Xuddunta Harar) ayuu baryay in Maka looga soo diro Shariif ka kaalmeeya dhisme magaalo ma guurto ah. Isaga oo "Magaca Wayn" adeegsanaya ayuu nebigii miskiinka ahaa Carabiya uga yeeray Shariif Yoonis, wiilkiisii Fakhr-al-Diin iyo fir Ansaar ah, ama u gargaarayaashii Nebiga. Waxay dageen Harar oo barakada joogintaankooda ku barwaaqowday. Sheekadaan waxaan ka faa'iidaysan karnaa in magaalada dib loo dhisay, horraanteediina ay bilaabeen oo degeen Carab gaajaysani. Shariifyadu si xiriir ah oo mar mar laga dhex galay ayay u soo xukumi jireen, ilaa dhawr fac uun ka hor markii reerka hadda xukumaa uu xukunka qabtay. Bruce sida uu qabo, waa Jabartiyiin inta Sayidyada ka guursaday nasab sheegtay. Waxay ku abtirsadaan Khaliif Abu Bakar iyo Caqiil ina Abuu Dhaalib oo Cali walaalki ah. Culimmadu, in kasta oo ayan ku dheeraysan karin, waxay caddayn u rumaysanyihiin in ay Gaalla [Oromo] cawaan ah ka soo jeedaan.

Magaalada Harar ee hadda jirtaa, qiyaas ahaan waa hal mayl oo dherer ah iyo intaa barkeed oo ballac ah. Darbi aan sinnayn oo dhowaan la dayactiray se aan kanooni karin ayaa waxaa ka daloola shan irdood oo waawayn oo ay taageeraan shan aargooyin qoolaabyo aan qurux dhismeed lahayn ah. Guryaha iyo qalcaduhu waxay ka samaysanyihiin dhagax adag oo aan sinnayn; dhagax dixeed iyo dhagaxciideedka buuraha oo sibir looga dhigay dhoobo, sidii magaalooyinkii hore ee Oromada. Guriga qura ee wayni waa [Masjid] Jaamaca, mooro dheer oo arrad ka muuqdo, irduhuna jajabanyihiin, laba minnaaradood oo madaxyo dhuubanna leh. Waxaa dhisay laba fuundi oo Turki Mukha iyo Xudayda ka kala yimi ahaa.

Middood ayaa mar dambe duntay, waxaana lagu beddelay mid xirfad liidata oo Harari ah. Magaalada dhir xoogaa roon ah ayaa ku taal, se ma laha beerihii degaannada Bariga siinayay aragga wacan ee balad iyo baaddiye la isku daray ahaa. Jidadku waa wadiiqooyin cariiri duud iyo deli ka dhac ah oo ay daadsanyihiin tuumisyo aad u waawayn oo qashin duddo eey cadho qaba ama il la'i oo xataa kuwooda ugu wanwanaagsan la dhagxiyo ay farfadhiyaan. Guryuhu badanaa waa hoosooyin dhaadheer oo saqafku fidsanyahay, laba laba fookh ah, irduhu hal loox ka qoranyihiin, dariishadana looga dalooliyay meel aasaaska ka sarraysa oo alwaaxyo qaab daranna lagu xardhay. Guryaha waawayni waxay leeyihiin qolal dumarka u gaar ah oo ku yaal halka daaraddaha ugu dambaysa, irdana waxaa u ah dhis bal Haruur ah. Dabaqadaha dadka ugu faqiirsani waxay degaan "Gambisa", waa aqalka raarka ah ee beeralayda buuraha e. Magaalada waxaa ka buuxa masaajid, guryo uun caadi ah oo aan minnaarado lahayn, qubuurahana waxaa laga taagaa daharro – looxyo qabaallo laydiqoolaab dhagax ah oo gudub dhinaca dhulka loogu muday. Waxba iiga ma baahna in aan sheego in ay Harar isku la wayntahay cilmigeeda, karaamadeeda iyo awliyadeeda, intaba. Waliga ugu muhiimsan ee magaalada ku duugani waa Sheekh Cumar Abaadir al-Bakri oo asalkiisii Jedda ka yimi, haddana xirsixiraha Harar ah. Waxa uu ku aasanyahay qubbi yar oo qaybta koofureed ee magaalada, Iridda Bisidimo, agteeda ku yaal. Magaalamadaxdii hore ee Haditah waxay Zabid-da Yaman la wadaagtaa iyada oo ku caanbaxday waxbarashada laga aflaxo, degmooyinka ku dhawdhawna waxaa ka buuxsama macallimiin faqiirro ah iyo wadaaddo suufiyoobay. Meel aanu cilmigu waxba kordhin raacashadiisa waxba lagu ma dadaalo,

[36] Suubbanihii Khadar ahaa. – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

caqliguna cawaannimo ayuu uun ku raagaa, sida uu leeyahay Faylasoofkii Volney[37]. Ma jiraan machadyo waxbarasho, dhawrtooyin waxbarsaho, sida guud ahaan Bariga ka jirta, sida muuqatana ardadu dhiirrigelin ma helaan. Buugta dhif ayaa loo helaa, waana qaali. Wax aan cilmiga Diinta ahayn la ma barto. Culimmada ugu waawayni waa Kabiir Khaliil, Kabiir Yoonis, iyo Sheekh Jaamac. Labada hore mar dhif ah ayay guryahooda ka baxaan, iyaga oo waqtigooda oo dhan u hibeeyay barasho iyo barid. Kan dambe [Jaamac] waa Soomaali siyaasadda door firfircoon ka qaata. Macallimiintaasi waxay wax ku baraan afka Harariga, af gooni ah oo aan gidaarrada magaalada dhaafsiisnayn. Naxwaha iyo sarfiga erayadaba waxay u muuqataa in  Carabi ku jiro, sida Soomaaliga iyo afafka kale ee gobolkan Bariga Afrika. Waa uun laan Semitig ah oo lagu tallaalay xidid af guri ah. Soo noqnoqodka joogtada ee xarafdalqeedka *kh* ayaa wuxuu ka dhigaa adayg aan loo bogin, wax qoraal la akhristo  ah ma leh – marka laga reebo heeso iyo sheekooyin ku qoran xarfaha Naskhiga casriga ah. Si wanaagsan ayaan iskay ugu sii dersi lahaa, waxaa se iga hor istaagay kanshe la'aan.

Dalmareenku hadde isna imminka waa in uu, sidii caadaada ahayd, aayarsadaa, illeen waa uu ku qancay ka jeedaalinta Pisgah[38]diisii Dhulkii Ballanqaadka ee Cilmiga oo aan filayo in mid iiga sii nasiib wacan loo qoray in uu hantiyo[39].

Saylac wuxuu Xaajigii iiga soo diray addoon Xabashi ah oo aqoonta afafka balo ku qaba. Haddii se aan oraahda la wada yaqaan adeegsado; ‘gacantiisa bidix ayuu dhegtiisa midig ku tilmaamayay’. Harar gudaheedada si aad ah ayaa na loo ilaalaynayay, ilaa in warqad iyo qalin la isa saaro la holi waayay. Ha se yeeshee, inta xagga Wilensi u fogaaday ayaan si kabta karinta saar ah u aruuriyay qaababka naxwaha iyo eraybixin sixi doonta sheegashada shaacday ee ah in ‘afku Carabi ka soo jeedo, Amxaarigana waa la tol’[40]. Harar ma laha af u gaar ah oo kaliya e dadkeeda yar ee 8000 qiyaasta ahi waa fir gooni ah. Soomaalidu waxay yiraahdaan, magaaladu waa Janno dameero degeen, dhab ahaanna muuqaalka kore ee dadku innaba soo jiidasho ma leh. Ragga waji qurxoon ku ma dhex arag. Jirkoodu waa qallayf isha ka dilan. Kuwo badan oo ka mid ahi waa himbiriirsanayaan, kuwana il baa furuq tiray, waxaana jirkoodii fool xumeeyay qaaxada qanjiradda gasha iyo cudurro kale. Qeexiddaa xun ee dhaqankooda ayaa u marag ah maahmaahda, ‘Qalbi adkaa ma Harari baa!’ Guud ahaan midabku waa hurdi maarriin xiga, garku ma dheera waana oo yuquf xuna sida timahoodaba aan la isugu duwi karin. Calaacalaha, cumaacumaha, cagaha iyo anqawyaduba waa waawaynyihiin oo si xunna u baxeen. Dhererku waa dhexdhexaad, duqayda qaarkoodna waxaa ka muuqday ‘kelyo buurbuuran’ iyo calooshii buurnayd ee Baaniyaalka, halka kuwo kale ay lafo dhuuban yihiin, sida Carabta ama Yuhuudda. Codadkoodu waa dhaadheer aan edboonayn. Dharku waa isku jir Carabi iyo Xabasheed. Madaxa waa xiirtaan, shaaruibbadana aad u gaabiyaan sida Shaaficiayada Yaman. In badan madaxu waa u qaawanyahay, qaar koofiyad badanaa rakaamo Hindi leh ama Takiyada suufka la yaqaan ee Masaarida ayay qaataan. In yar ayaa duubka cad ee Harariga wanaagsan ah si debecsan dhegaha dushooda ugu

---

[37] Constantin-François Chassebœuf, Comte de Volney (1757-1820),  wuxuu ahaa faylasoof Faransiis ah. –*[T]*

[38] Buurta Pisgah (Pizge) waxaa la sheegaa, si ay tahayba, in ay ahayd tii Nabi Muuse (nk) iyo dadkiisii markii ay Masar ka soo qaxeen uu inta u baxay ka arkay dhulkii ay u socdeen ee Kancaan. Dhulkan waxaa kale oo lagu magaacaabaa Dhulkii la Ballanqaaday (the Promised Land).  – *[T]*

[39] Harar waxaa waa dambe qabsaday oo xukunkooda toos u hoos geeyay boqortooyadii Xabasha. – *[T]*.

[40] Tani waxay u dhigantaa iyada oo la yiraahdo afka degmooyinka Basque [Fransa iyo Isbayn u dhaxeeya, afkooduna isla magacaa leeyahay] waa Faransiis Ingiriisiga xiriir la leh. – *[B]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

duubta. Dharka kore waa go' la raariciyo, sida carriga Soomaalida, ama dhexda lala guntado suunka toorrayda. Dabaqadaha maalqabeenka ahi Futah ama qayd ayay ka hoos guntadaan, dadka la qaddariyaana waxay qaataan qamiisyo Carbeed oo bafto cad ah. Kabo saandal maas adag ah, tusbax iyo caday ay caadaysiga tubaako ruugiddu qasab joogto ah ka dhigtay ayaa labbiska dhammeeya. Hubku, maadaama uu waddooyinka ka reebbanyahay, reer magaaluhu waxay sitaan ulo shan ilaa lix cagood dherer jeeda. Dumarka oo aad uga badan ragga, sida ay u badantahayna ay ugu wacanyihiin addoomaha dumarka ah ee badan, waxay u muuqdaan in ay raggooda ka qurxo badanyihiin. Waxay leeyihiin madaxyo yaryar, jir siman, saman toostoosan, indho waawayn, afaf qaabka Qawqaaska dhadhawaynaya iyo midabbo hurdi furan ah. Dharku, aan iraahdee, halkan waa qurux qariye. Shaati suuf ah oo dheer oo ballaaran, gacmo gaabna ah sida cabbaayadda Carabta, midab lafcir ah lagu aslay ama bunni tiq ah oo lagu xardhay saddexgees casaan ah. Hore, gadaal, garabka hoostiisa iyo shafka inta laga kala rido ayaa dhexda lagaga xirtaa suun suuf cad ah oo xoruhu casyihiin. Haweenka dabaqadaha sare ahi marka ay guriga ka baxayaan garbasaar buluug ah ayay madaxa saartaan, waa na dhif in ay indhaha shareertaan. Timaha inta dhexda ka kala baraan ayay laba galaan oo waawayn dhegaha hoostooda isugu keenaan oo gambo midab buluug mugdi ah ama ilyar ay labadeeda dacal garka hoostiisa isaga xirmaan ku daboolaan. Taalooggan waxaa wareegga madaxa isu la haya masar saatiin buluug ah oo ballaarka ku kala duwan, hadba sida qofka xirani uu u heli karo. Qaarkood waxay ku qurxiyaan biinan waawayn oo midab dahabi ah leh, kuwo kale waxay ku duubaan Taash geedsaar carfoon ah, kuwo kale inta timahooda oo aalaaba hirar leh ee aan xariir ahayn, dherer cuffanna u baxay, guntin á la Diane[41] isugu duubaan ayay qadaada ka xiraan. shareer timo biigado gaagaaban oo isu dhow leh oo ka soo daatay xirmada hoosteeda ayaa garbaha si xallad leh ugu dhaca. Mardaadiga qalinka ah waxaa xirta oo kaliya qofafka sarsare. Dhegta waxaa lagu qurxiyaa dhagagashi kuul Soomali Cunaabi shacaabi cas ah, luquntana kuul isla noocaa ah, cududahana lix ama toddoba sindiyado balballaaran oo gees lo'gisi ama geesaha kale ee madmadow oo sidii Galbeedka Hindiya loo sanceeyay ah. Ugu dambaynna, xiddigo ayaa lagu khaddaabaa namasta, sunniyaha rinji ayaa lagu dheereeyaa, indhaha waa la kuulaa, gacmaha iyo cagahana cillaan ayaa la marshaa.

Codka dumarku waa qallayf qaylo ah, gaar ahaan marka ay ka daba hadlaan codka oorganka macaan ee ragga Soomaalida. Dumarku guriga ayay ku hawllanyihiin, iyaga oo cudbiga go'yaasha, masarrada iyo cimaamadaha laga sameeyo miiqaya ilmahoodana dhabarka ku sida ayay biyaha ceelasha kaga soo qaadaan qulco waawayn oo madaxa lagu qaado, beerrahana falaan. Raggu iyaga oo sidii Xabashida hawshaas sharafdhac u haysta ayay fariistaan oo wax ku iibiyaan suuqa jidka dheer ah oo halkan u dhigma basaarkii Bari. Ruugidda tubaakada ayaa waqtigooda inta badan dhaafisa, kuwooda maalqabeeka ahina waxay si qumman ugu dhaashtaan subag, halka kuwa faqiirrada ahi ka adeegsadaan haraadiga xaydha idaha. Anshaxa oo ay ku adagyihiin ayaa marar jeedlid fagaare ah laga ma maarmaan ka dhiga. Inta hawshaasu ayan bilaaban, dhawr qulcood oo biyo qabow ah ayaa madaxa iyo garbaha lagaga daadshaa eedaysanaha, dabadeedna shaabuug hal fayraq ah si fiican loola dhacaa. Lab iyo dheddigba dadkani saqajaannimada waa ku caan. Madax iyo majaba si caddaan ah ayay cabbitaannada lagu sakhraamo biir iyo miid[42] u macaansadaan. Amiirku wuxuu sameeyay

[41] Diane Artemis ( ?). Mid ka mid ahayd qareennadii ay Giriigii hore barakaysan jireen oo lahayd qaab haweenay aad u qurxoon. - *[T]*

[42] Khamri guri malab iyo biyo la isku qooshay laga sameeyo. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

kormeerto biyakamadhibcaan ah oo si naxariisdarro ah u uleeya kuwa saacad go'an dabadeed lagu qabto jidadka. Waa cunsuriyiin xad dhaafay, gaar ahaan liddiga Kiristaanka, dhaxalkii dagaalladii ay Xabashida la galeen iyo "ku Jihaadka" Oromada oo ay guulo badan ka sheegtaanna waa ka helaan.

Waxaan arkay warqad uu Amiirkii dhintay Xaaji Sharma'arke u soo diray oo ku faanayo in uu 1000 gaal dilay, isagoo si afmaal ah uga baryaya dhawr rodol oo baaruud Ingiriis ah. Hararigu ajnabiga si gaar ah ayay nac iyo nacdiir ugu hayaan, waxayna u qaybiyaan laba nooc oo kala ah Carab iyo Soomaali. Kuwa dambe, in kasta oo ay ku dhawaad saddex meelood oo meel bulshada ka yihiin ama 2,500 oo ruux, waa haddii aan erayadooda adeegsado e, waa rakhiis, sida xashiishka. Fulaynimada caadada u ah waxaa sii kordhiya awood iyo isxammayn la tusay, halkaa oo erayga "xabsi" uu argagax ku rido. Kuwa kale waa ilaa 3000 oo badwi 'gal oo bax' ah. Ilaa irdaha magaalada lagu keeno, carriga waxaa dega Oromada. Dadkan aan xasilloonayn wa in hadiyado maryo ah lagu laaluushaa, ilaa 600 oo go' ayuu sannad walba Amiirku qaybshaa. Waa dhawayd, mar furuq magaalada ka soo fiday uu in badan ka laayay, xigtadii dadka dhintay ayaa waxay dalbadeen oo la siiyo mag. Si fudud ayay meesha ku qabsan karaan, se waxay u daynsanayaan tooda. Oromadaasi waa geesiyo, rasaasta buntukha waxay kaga gabbadaan iyaga oo dhulka dhambacaad isu tuura marka ay hillaaca arkaan, waa fardafuul wanaagsanyihiin, warankana si xirfad leh ayay u adeegsadaan. In kasta se oo ay caado ahaan ay fir xun yihiin, dadka magaaladu wanaag ayay ka sheegaan. Soomaalidu dhib ku ma qabto in ay ku dhex safraan. Marar badan ayaan Saylac iyo Harar ka maqlay iyada oo ganacsato ay gaareen ilaa Galbeedka fog, iyaga oo toddoba bilood hadba dhinac u jara dhul cawaan jijimo dahab ah xiran, ilaa ay Badda Milixa ah ee Faranjigu doomaha shiraaca leh kaga goosho ka gaaraan. Wilensi nin Maxamad la yiraahdo oo Sheekhaal ah ayaa wuxuu i siiyay diiwaankii safarkiisa oo 15 minqaad uu ku gaaray isha Wabiga Abbay, ama Niilka buluugga ah. Wuxuu qiray kuteenta aan cilmiga ku dhisnayn ee Soomaalidu sheegto in Hawaash iyo Webi Shabeelle ay labaduba ka unkamaan silsiladda buuralayda dhirta badanah ee uu ka curto wabiga [Niil] Masar[43].

Dawladda Harar maamushaa oo dhammi waa Amiirka uun. Amiirradaa naxariista darani waxay caado u leeyihiin in ay dilaan or xiraan dhammaan kuwa looga shakiyo ama damac ka galo kursiga xukunka. Axamd awoowgiisii labaad wuxuu ku dhintay xabsi, aabbihina dirqi ayuu sidaa si la mid ah kaga badbaaday. Markii Amiirka hadda xukunka hayaa uu xukunka qabtay, waxaa la sheegay in Makadka ama beeldaajaha Oromada reer Noole uu u sheegay in maxaabiistiisa uu u soo daayo ama uu faraskiisa kooraysto oo uu magaalada isaga baxo. Si ay ahaataba, saddex ilma adeerti ah ayaa markii aan Harar booqday xabsi go'doomis ah ku jiray. Mid ka mid ah ayaa xilligaa dhintay, waxaana lala aasay seetadiisii silsilad ahayd. Soomaalidu waxay sheegaan in xabsiga dawladda ee Harar uu ka hooseeyo qasriga, qofkii mar galaana uu ku abaado garka iyo ciddiyaha oo ku baxa ilaa maalinta madaxiisu furto. Amiirka Axmad ah xaaladdiisa caafimaad ma sugna. Qaar waxay tabar la'iddiisa sabab uga dhigaan faras uu waa ka dhacay, kuwo kalena waxay sheegaan in xaasaskiisa middood ay sumaysay. Anigu qaaxo feeraha u fadhiisatay ayaan ku xukumay xaalkiisa. Geeri ayuu qarka u saarnaa wax yar ambabaxygii ka dib, dabadeedna dhakhtar ayuu ka dirsaday Cadan. Afar

---

[43] Niilka Masar. Halkan waxaa ka cad in safarkii dambe ee Burton uu ku goobayay isha Wabiga Niil uu warkiisa Soomaalida iyo dadkii kale ee uu Geeska Afrika ku arkay ka helay. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

xaas ayaa u dhaxa. Tan koowaadi waa gabar uu dhalay Garaad Xirsi, tan labaadi waa haweenay reer Sayidka Harar ah, tan saddexaad waa addoon la xoreeyay, tan afaraadna waa gabar uu dhalay Garaad Cabdimajiid, mid ka mid ah ragga madaxda sare ah. Laba wiil ayuu dhalay oo sida ay u badantahay aan waligood xukunka qaban doonin. Midkood waa ilme dhashay, kan kalena waa wiil yar oo ilaa shan jir ah.

Amiir Axmad saddex sano ku dhawaad ka hor ayuu abbihi xukunka ka beddelay. Xukunkiisu waa adagyahay, haddii aanu caddaalad ahayn, wixii sir ahaana waa u dhanyihiin. Sida Amxaaraduba tiraahdo ”Sarreeyaha callooshiisa la ma ogaado”. Xataa Garaad Maxamad, in kasta oo mar walba shirka cudur iyo caafimaadba looga yeero, ku ma dhaco in uu talo aan la wayddiin dhiibto. Carmaladda idman ee Gisti Faadumana seeto bir ah ayaa loogu gooddiyay haddii ay faragelinta arrimaha siyaasadeed dayn waydo. Axmad shaqadiisa ugu wayni waa dabagalka ilma'adeertiisa u daacadda ah, isaga oo cabsi aan sal lahayn ka qaba Ingiriiska, Turkida Xaaji Sharma’arke iyo hanti uu ku urursaday ganacsi iyo boolimeersi. Dacwooyinka madaniga ah iyo kuwa diineed isaga ruuxiisa ayaa kala xukmiya, se faragelin yar ayuu Qaaddiga magaalada, Cabdiraxmaan bin Cumar al-Harari, uga oggolyahay. Qaaddigu, in kasta oo aad looga dambeeyo, badanaa la ma dhibo, maadaama guud ahaan xukun degdeg ah la door bido. Ciqaabtu marka ayan lacag khusayn, badanaa waxaa loo eegaa sharciga Islaamka. Qofka wax dila jidka suuqa ayaa la keenaa, indhaha loo duubaa, lug iyo gacanna waa laga xiraa. Qofka dad u xiga qofkii la dilay ayaa dabadeed madaxa middi gaallays culus oo afaysan ah qoorta uga gooya, maydkana xigtada ayaa la siiyaa, si ay aas Muslin ugu sameeyaan. Haddii jafta hore ay guul darraysato, sida badan edaysanaha cafis ayaa loo fidiyaa. Marka qof madani ah uu toorray u la baxo mid kale ama shaqaaqo geysto, si nooc silloon ah ayaa loo ciqaabaa. Laba nin ayaa jeedal fardoodyadooda dhabarka iyo shafka kala dhaca, amiirka oo ciqaabta horstiisa lagu fuliyo ayaana amarka lagu joojinayo bixiya. Xatooyada gacan goyn ayaa lagu ciqaabaa, kuwa dawladda dambi ka galana xabsi ayaa lagu abaalmariyaa. Waa meel baas xabsigu, maxaa yeelay maxbuuska bir culus ayaa lagu jabshaa, hul qarmuun oo loo nacay ayuu yaal, wax cunno ahna ma helo, marka laga reebo waxa reerkiisu u keeno, ama uu iibsado, ama uu waardiyeyaasha ka baryo. Waa dhif in xaaladahaas looga dabciyo. Ganaaxa iyo lawareegiddu, sida Bariga caadada ka ah, waa ciqaabaha boqorku ka helo. Wilensi ayaan kula kulmay oday Harari ah oo beerihiisii iyo hantidiisii dhammaan lala wareegay, maxaa yeelay; wiilkiisii ayaa garsoorka ka baxsaday, ka dib markii uu nin qudha ka gooyay. Amiirka waxaa la sheegaa in uu haysto kaydad badan oo qalin, bun iyo fool maroodi ah. Kaaliyahayga, Xammaali, ayaa mar qasriga gudihiisa la geeyay, halkaa oo uu ku soo arkay sanduuqyo waawayn oo nocii hore ah oo doollar in lagu guro loogu talo galay. Lacagta kaliya ee Harar waa maar xun, gacanta lagu tumay oo wax qurux ah aan lahayn, sidii lacagta casriga ah ee Talyaaniga. Dhinac waxaa kaga yaal erayada Zaribet al-Harar, lacagta Harar. Dhanka kale waxaa ku yaal taariikhda 1248 Hijrada Dabadeed. Amiirku si naxariisdarro ah ayuu u ciqaabaa dhammaan kuwa magaalada lacag kale soo geliya.

Amiir Axmad wuxuu ka warqabaa in dawladaha qaarkood ay amiirro ku tiirsanyihiin. Hub iyo tusbaxyo midna agtiisa loo ma oggola, gacanyaraha qasriga faraqiisuna waa u calyoqub. Mar walba oo wax la siinayo ama wax laga qaadanayo waa in gacantiisa la dhunkado. Xataa marka uu faras ku joogo, laba gacanyare ayaa farqaha maryahooda ku babbibaya. Kaliya


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

marka uu buuqashooyinka Haaruuniga[44] ah oo uu sidii aabbihi habeenkii ku maro jidadka iyo wadiiqooyinka mooyee mar walba waxaa ku xeeran waardiye adag. Masjidka waxa uu aadaa isaga oo darsin fardoolay ahi ay galbinayaan, labaatameeyo niman banaatiikh iyo jeedallo sita oo lug ahna ay hor socdaan. Dhinaciisa waxaa socda sarkaal u haraynaya dallad saatiin cas ah oo farqo badan leh, waa calaamadda maamuuska amiirnimo ee Hindiya ilaa Xabasha e. Xataa marka uu salaadda tukanayo, laba ama saddex la xulay oo buntukhyo ku hubaysan ayaa baaruud shidan la dul taaqan. Marka uu faraskiisa ku joogo dadwaynaha dhexdiisa, waxaa galbiya koox ilaa konton nin ah oo iyagoo cag ku jooga oo ordayainta ay shaabuugyada wirqiyaan ku dhawaaqa ”ka leexo! Ka leexo! Dadwaynuhuna waxay dhangadahaa kaga fogaadaan iyaga oo guriga ugu dhow dib ugu gurta ama jid kale u carara. Ciidanka Harar tayo ma leh. Waxaa jira labaatan ilaa konton niman kabriidyaraal ku hubaysan ah oo Carab waa hore dalka degtay ka soo jeeda, uuna xukumo ruugcaddaa Magribi ah. Waxay sannadkii mushaaro u qaataan wax u dhigma hal doollar oo haruur ah, xig shan ilaa lix rooti ugu filan maalintii, rakaadaha nolosha haddaa waa in xeelad kale oo nabdoon lagu la soo baxaa. Isugeynta ragga hubaysan, marka addoomaha lagu daro, waa qiyaastii laba boqol oo nin.
Ciidanku waa mid ku hubaysan waran Soomaaliyeed ama Oromo, mid toorray sita, mid kale oo sita seef badanaa tii fardoolaydii Jarmalka ee hore ah. Kanooni riddo yar ayaa lagu malaynayaa in uu qasriga gudahiisa ku qarsoonyahay, se sida dhaci karta cid adeegsigiisa garanaysaa ma jirto. Magaalada waxaa laga heli karaa soddon faras oo darsan ka mid ahi ay hanti boqortooyo tahay. Waa geenyooyin il daran se si fiican buuraha iyo qirarka loogu laylyay. Badawida Oromadu ciidan xooggan oo warmoolay ah ayay ugu babacdhigaan duullaanka. Magaaladan u soo dhowaadkeedu waa dhib badanyahay oo waa halis, se waxaa laga xukumaa waqooyiga iyo galbeedka, darbiyaduna waa isku dumi lahaayeen haddii uu six-pownder[45] mar taaban lahaa uun. Saddex boqol oo Carab ah iyo laba qori oo ’la durduri’[46] ah Harar saacad gudaheed ayay ku qabsan karaan.

Harar waa magaalo ganacsiga muhimmad ku leh. Dadkeedu waxay, sida kuwa Saylac, ku noolyihhin khiyaamaynta badwida Oromada, Amiirkuna wuxuu reebay wax ku kala iibsiga miisaanka. Dameerkii raran ee magaalada irdaheeda soo dhaafaba wuxuu ka qaataa canshuur u dhiganta siddeed ilaa shaniyotoban baac oo maro Qaaj (Cutch) adag ah. Taasi waxay sabatay in dameerka rarka lagu cusleeyoo oo qaadkiisa looga badiyo ilaa ay gaadho in wadeyaashiishu ay la hinjiyaan. Beeralayda boqolkiiba toban ayaa la canshuuraa, qiimaha sahlan ee dhankan Afrika, se waxay ku bixiyaan waxa laga canshuurayo wax la mid ah, taa oo aad u kordhisa qiimaha qaybta dawladda u go’aysa. Ganacsiga ugu wayni wuxuu Harar keeni karaa ilaa £50 oo badeeco ah, kan £20 ka haystana nin maalqabeen ah ayaa loo haystaa. Dadku waxay u muuqdaan kuwo han yarida Aasiyaanka wax u weheliyaan, xataa marka macaash la doonayo. Markii aannu magaalada soo galnay, safar ayaa berri oo kale in uu

[44] Kormeer guure ah. – *[T]*
- Sheeko hore ayaa waxaa laga sheegaa Amiirkii Abiibakar ahaa in mid ka mid ah kormeerradiisii guuraha ahaa uu ku maqlay saddex nin oo raaciyaddiisa ka mid ahaa oo khiyaamo qaran ku faqaya, iyaga oo xaaskiisa ,cunnadiisa iyo kursigiisa kuunyaya. Subaxii dambe ayuu u yeeray oo mid cunno heer sare ah ka dharjiyay, dabadeedna in uu cuunnadii dhammayn waayay darteed u karbaashay. Kii labaad isagana si xun ayuu u karbaashay, sabata oo ah ; wuxuu kala aqoonsan waayay farqiqa u dhaxeeya xaaskiisa iyo amiiradda. Kii saddexaadna isaga qudha ayuu ka jaray. – *[B]*
[45] Nooc kanooni culus ah. – *[T]*
[46] Kanooni fudud oo waayadii hore fardaha lagu jiidan jiray (the galloper gun). – *[T]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

Saylac u baxo u qalqaalsanaa. Toban beri ka dib, xataa badhki ma diyaarsanayn. Waa dhif in habeendhax afarta minqaadd ee magaalada bariga ka aada lagu jaro, isku ceceliska masaafada safarkoodu jarana ma foga, xataa tan Soomaalida ruuxeeda marka loo eego.

Waxyaalaha ugu badan ee Harar laga dhoofiyo waa addoomo, fool maroodi, tubaako, sacfaraan, go'yaal iyo maryo soohan, dameero, haruur, "Karanji"- nooc muufo socotadu qaataan ah, subag, malab, xabko (khaas ahaan luubaan iyo beeyo), iyo ugu dambayntii subaga idaha iyo nooc walba oo xayr ah. Waxyaalaha la soo dajiyo waxaa ka mid ah maryo Maraykaani iyo dharka kale ee suufka cad ama aslan laga sameeyo, baftada adag, shaalalka cascas, xariir, maar, maarta fidsan, mindiyo (badanaa kuwa raqiiska ah ee Jarmalka), *Birmingham trinkets*, kuulo iyo shacaabi, timir, bariid, sonkor muraysi, baaruud, warqad iyo waxyaabaha kale ee magaalo duur ku taal looga baahdo.

Harar, sidii ay waayadii horeba ahaan jirtay, waa sayladda wayn ee addoomaha Zagaro, Guraage, iyo qabiilooyinka Gaalla, Aale iyo kuwo kale laga keeno[47]. Xabashida iyo Amxaarada oo ah kuwa ugu qiime badan, dhif ayay noqdeen ilaa intii Boqorka Showa uu dhoofintooda reebay[48]. Dumarka qiimahoodu waa kala duwanyahay oo waa 100 ilaa 400 oo Ashrafi, wiilashana 9 ilaa 150. Kuwa ugu liita ee aan lacag fiican goynanyn qabbaanimo ayaa loo haystaa, kuwa ugu wanaagsanna waa la kaxeeyaa oo loo dhoofiyaa Carabta Galbeed ama raaciyadda, Madaxiisu Kor ahaaye, Imaamka Masqad [Cummaan] ayaa bariid iyo timir laga siisan jiray. Dirqi ayay igu tahay haddii aan iraahdo marka addoonsigu dhammaado ganacsigu waa bullaalayaa. Wallee inta Felateas [?] ama Manrazzias [?] loo oggolyahay in ay sii jiraan, waa adgtahay in dhulkan waxsoosaar laga fisho. Harar, fool maroodigu Kufaarta dhexdooda waa ka takrifal boqortooyo, Amiirkuna ganacsi dhan u janjeera ee boqortooyooyinka Africa lagu yaqaan ayuu ku dhaqmaa. Maroodiyadu waxay ku badanyihiin Jarar, kaynta Herer, Xariirad iyo toggagga kale, meelahaa oo ay maciin bidaan xilliga kulaylaha, qaboobahana carriyada hoose ayay u soo degaan. Gaallada ayaa ugaarsada wixii ka soo baxana qayd yar ayaa laga siiyaa. Amiirku foolmaroodiga wuxuu u diraa Berbera, waxaana u iibiya Wakiil. Nooca ugu yaryar waxaa lagu magacaabaa "Rubac Caaj", kan ka roonna "Nus Caaj", halka "Caaj", oo kan ugu wanaagsan ahi, uu joogo saddexiyosoddon ilaa afartan doollar, Faraasiladda 27 rodol Carbeedka ah.

Bunka Harar aad ayaa suuqyada Yurub looga yaqaan oo qeexid u ma baahna. Beeraha magaalada oo dhan waa uu ka baxaa, aadna wuxuu ugu badanyahay xagga Gaallada Galbeed. Waxa uu si wacan uga baxaa Jarjar, degmo abbaaraha todoba maalmood looga socdo Harar, xagga waddada Cifaat aadda. Waxaa la yiri, Amiirku shaygaan qaaliga ah wuu xakameeyaa, isaga oo ka baqaya in uu suuqa Berbera ku fataho. Waxaa kale oo uu reebay in Xarashka ama dadka bunka beeri yaqaannaa ay dhoofaan, si uusan cilmiga geedka bunku u lumin. Markii aan Harar booqday, qiimaha xirmada 27 ka rodol ahi waxay joogtay rubuc doollar, kirada

---

[47] Gaallada Caruusiga ah badanaa si toos ah ayaa Ogaadeen looga keenaa oo Berbera loo geeyaa. – *[B]*

[48] Maahmaahda reer Bari waxay tiraahdaa, "haddii aad garab doonayso Nuubi iibso, haddii aad maal rabto Xabashi, haddii aad dameer rabtana Sawaaxili (neegar)". Waagii hore xirmo yar oo milix ah ayaa wiil looga iibsan jiray Koofurta Xabasha, ha se ahaatee, intooda badani inta xeebta loo soo wado ayay dhexda ku le'an jireen. – *[B]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

ratiga 12 xirmo Berbera gaynayana waxay ahayd shan doollar. Haddaba, faa'iidadu hawsha iyo khatarta laga mudanayo u ma qalanto.

Tubaakada Harar midabkeedu waa hurdi furan oo dhadhan wanaagsan leh, waxaana lagu dari karaa oo lagu sii wanaajin karaa nooca Suuriya ama kuwo meelo kale ka baxa. Aale-da, ama Gaallada Galbeed ee beeralayda ku horraysa ahi waxay la beeraan haruurka, shan bilood dabadoodna waa goostaan. Muddo laba toddobaad ah ayaa la kariyaa, qaybta geedka ah ayaa laga saaraa, caleentana jawaanno lagu cabbeeyaa, si Berbera loogu safriyo. Marka Harar la joogo, raggu waxay door bidaan calalinta iyo sidaa oo kale cabbidda. Dumarku guud ahaan waxay cunaan tubaakada Surat. Sida badeecooyinka la midka ah oo dhan ayaa beegis lagu iibsadaa, qiyaasta todobaatan rodolna doollar ayaa la siistaa. Wariska[49] ama sacfaraanbeenaadka si fiican ayaa magaalada looga beeraa, in badanna carriga Oromada ayaa laga beeraa. Marka roobabka culusi joogsadaan, laba bilood dabadeed ayaa la soo ururiyaa. Shaygaan iyo addoomaha ayaa ah waxa ugu badan ee lagu kala ganacsado, inta u dhaxaysa Berbera iyo Masqad. Marka Caraabiya la joogo, raggu shaatiyada ayay ku asladaan, dumarka iyo carruurtuna waxay u adeegsadaan in ay jirka hurdi ifaya kaga dhigaan. Marka isku qurxinta laga reebo, waxaa kale oo uu noqdaa wax hargabka lagu daweeyo.  Marka Warisku Harar raqiis ka yahay, hal rodol waxaa lagu iibsan karaa rubuc doollar.

Toobabka iyo shaashashka Harar waxay u dhigaan maryaha aadka loo yaqaan ee Showa. Gacanta ayaa lagu sameeyaa, waxayna aad qurux iyo adkaysiba uga sarreeyaan kuwa aan nahda lahayn ee warshadaha Yurub laga soo saaro. Maaxaa yeelay, gacanta wanaagsan ee dadka ayaa ka sidata makiinadaha tan ugu wacan. Xagga Xeebta, hal maryahaa ah ayaa hadiyad wanaagsan u noqota ugaas reerood. Toobka Harariga ah wuxuu u samaysanyahay koobiyotoban baac oo dherer ah iyo laba ballac ah, wuxuu leeyahay xor casaan ifaya ah. Qiimaha kan wanaagsan, xataa magaalada dhexdeeda, waa siddeed doollar. Waxaa laga sameeyaa suufka nud'dheeraha ah oo buurahan aad uga baxa. Waa jileec xariir ah, diirranaantiisana si wanaagsan ayaa dhaxanta dayrta looga xiran karaa. Duntiisa waxaa laba biin oo geed laga qoray ku maleega dumarka, ukurkana duubiddiisa rag iyo dumarba waa ka shaqeeyaan.

Saddex safar ayaa sannad walba Harar ka baxa oo suuqa Haygaysa aada.
Kan hore wuxuu baxaa horraanta bisha Jannaayo, wuxuuna qaadaa bun, dhar, Waris, subag, xabko iyo alaabooyin kale oo lagu soo beddesdho suuf, xariir, shaalal iyo tubaako Surat. Kan labaadi bisha Febraayo ayuu baxaa. Safarka wayn ee geeya addoomaha, dameeraha iyo alaabooyin kale oo qiimo leh, wuxuu Berberana soo galaa dhawr beri inta aanu xilliga ganacsigu dhammaan. Waxuu tiro la'egyahay  3000 oo ruux, waxaana hoggaamiya sarkaalka saree Amiirka ee darajada Ebi ama hoggaamiye sita. Mid ama dhammaan safarradaas waxaa jidka ku joojin kara qabiilka Jibriil Abokor. Afar ama shan boqol oo doollar ayaa carrigooda dhexdiisa lagu bixiyaa ama xataa waxaa laga yaabaa dagaal xagga badda ah oo carwada [Berbera] ka dhaca. "hadba kii Berbera xukuma ayaa hoggaanka Harar garkiisa gacanta ku haya", waa oraah aan xataa magaalada ka dhex maqlay.

[49] Warisku waa geed dhowr nafac leh oo gabbaldayaha u eg ka se qaab duwan. Mirihiisa saliid ayaa laga tuujiya, sida gabbaldayaha iyo sisinta oo kale. Ubaxiisa waxaa loo adeegsadaa midabaynta cunnada iyo waxyaalo kale, sida sacfaraanka. Ha se ahaatee, waa ka duwanyahay sacfaraanka qumman. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Agabka guri ee Harar sidaa uma badna. Waa iska dhawr harag iyo marar dhif ah roog Beershi ah, kuraas, dermooying qallafsan, barkimo Soomaali, fandhaallo, iyo qaafiriyo inta godin lagu qoray oo middi lagu xanaf tiray dabadeed asal lagu caseeyay oo sulub dhalaalayana lagaga dhigay. Qulucdu waa shay meel walba carrigan lagu arko, gudaha ayaa laga deebiyaa, fur isla noocaeeda ahna waa loo sameeyaa. Waxay noqotaa koob, ubbo, beeb iyo weel biyood intaba. Nooc dheri culus oo dhoobo madow ama bunni ah ka samaysan ayaa la adeegsadaa. Dadka Harar deggan noloshoodu waa wanaagsantahay. Hilibka ugu wanaagsan, sida xagga Xabashaba, waa kan lo'da. Wuxuu se u ekaa, xilliga diraacda oo aan anigu cunay, sidii sararihii buurnaayee is haystay ee doofaarkii England-tii Hore, waayihii Hogarth. Boqol iyo labaatan digaag ah, ama lixdan digaag waawayn ah, waxaa lagu iibsan karaa hal doollar, dadkuna bakhti u ma haystaan, sida Soomaalida. Hilibka arigu waa wacanyahay, idaha Berbera ee madaxa madowna, halkan iyo meelo kale ba, marka roobku da'o dabadeed waa hilib macaanyihiin. Waxaa lagu noolyahay waa haruur. Miruhu iskood ayay isaga baxaan, cunto ahaan se loo ma qiimeeyo. Moos bukeenigu waa adayg aan fiicnayn, canabka si fiican u baxay waa dhif, in kasta oo brab-ku ravive mar walba ku baraaro. Geed timireedkuna carrigan wuxuu noqdaa harac aan miro laga dhalin, dadkuna ma yaqaannaan sida liinta loo khaleeyo. Wax khudaar ah oo aan bocor ka ahayn la ma yaqaan. Khasabka oo buurahan aad uga baxa ayaa sonkor yar laga saaraa. Malabka oo sida Xabashidu yiraahdaan "dhulkuu qurmiyaa" ayaa badanaa wax lagu macaystaa. Dhenegsiga Bariga Afrika waa basbaasgaduudka.

Aan u soo noqdo e, gacaliye L.[umsdenoow], halkii uu noo marayay dalmarkii Harar. Durba, markii aannu nimi ka dib, ayaa waxaa noo yeeray Carabta oo iskujir la yaab leh ah ahaa. Midkood, Xaaji Mukhtaar, wuxuu ahaa Magribi Feez[50] ka yimi. Qurbeajoog afartan sano ahi wax ayuu ka beddelay Carabigiisa xabeebta ah iyo "wajigiisa jilifta leh". Ninkani beer bun ah ayaa loo qoonddeyay, illeen waa kan u taliya ilaalada Amiirka e. Ha se ahaatee, wuxuu aannaga isu keen baray ganacsade, taas oo sababtay in aan jaajuusnimo ku tuhunno. Mid kale, Xaaji Xasan wuxuu ahaa Beershi dhalad ah, wuxuuna u muuqday mid cid walba yaqaanna oo heshiis fiican la ah dunida nuskeed, Qaahira ilaa Kalkatta, Muslim, Masiixi iyo Cawaan inta ba. Inta soo hadhay waxaa ka mid ahaa wiil Maka ka yimi, nin reer Masqat ah, mid u dhashay Suways, iyo madani reer Dimishiq ah. Kuwa kale waxay ahaayeen Carab Yaman ka timi. Dhammaantood markii hore si wanaagsan ayay noo la dhaqmeen, se markii Amiirka sheekadii aan lahayni joogsatay way naga dideen, si ulakac ahna noo gooyeen.

Carabta waxaa xigay Soomaalida oo Xammaali iyo Guulleed Dheere ay ka dhex heleen qaraabo, saaxiibbo iyo wajigaradyo markiiba u gartay shaqaalihii dawladda ee Cadan. Martidaasi cabsi iyo argagaxa ay xabsiga Harar ka qabaan ayay markii hore noogu yimaadeen. Waxay raggayagii la jeclaysteen in ay habeennimada noqdaan, marmarsiyo joogto ah oo ay waxtar ku doonayaanna waa noo la yiaadeen. Baqdintoodii, si ay ahaata ba, dhakhso ayay uga suushay oo muggaa waxay bilaabeen in ay maaweelooyin diyaariyaan. Annaguna,illeen lacag ma aannaan wadane, waxyaalo badan oo naftu u baahnayd ayay iskood noogu keeneen. Saddexdii Habar Awal ee aannu colka lahayn, markii ay arkeen in nasiibku xaggayaga u janjeero ayay tabahoodii beddeleen. Eeddii hore waxay dusha ka saareen labadoodii wehel ee Harariga ahaa, waxayna soo jeediyeen in ay iyagu Abbaan noo

[50] Magaalo taariikh dheer oo dalka Tuuniisiya ku taal. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

noqonayaan ku noqoshadaya Berbera. Si edboon ayaa yaboohaas la isaga caabbiyay. Waa tan hore e, abbaanno horay ayaa na loo ku yeelay. Tan labaadna, raggani waxay ka dhasheen Cayaal Shirdoon, jilib ay colaad xuni dhextaal Garxajis. Wax dhib ah, intii awooddooda ahayd noo la ma ayan harin, se bayaxownimadaydii ayaa ka qaalib noqotay.

Nasasho maalin ah ka dib, ayaa waxaa duhur hore noo yeeray Khasnajigii, si aannu Garaad Maxamad ugu martino. Anigoo seef gacanta ku sita, Guuleed Dheere iyo Xammaalina i daba socdaan ayaan ”qasrigii” aaday. Qol yar oo dabaqa hoose xagga midig ku yaal una dhow qolka martida haddii aannu galnay, waxaannu ugu tagnay wasiirkii oo mfrish wayn oo roogag Beershi ah lagu gedaamay fadhiya. Waxaa ku hareeraysnaa lix garaadyadii walaalihi ahaa ama la taliyeyaashii ah oo laba ka mid ahi duubab xirantahay, inta kalana madaxyadu xiiranyihiin oo aanay duubnayn. Go’yaashooda, sida dhaqanka munaasabadahaan oo kale dhigayo, sinaha ayaa loo raariday. Qaybta hoose ee cariishka kuraas ayaa lagu safay, halkaa oo ay Soomaalidaydii salka dhigeen. Waxay u ekayd in ay xilligii xisaabtanka kastanka ahayd, maxaa yeelay magacyana waa la diiwaan gelinayay lacagna waa la dhiibayay. Madaxdu Qaat ayay cunayeen, ama sida halkan looga yaqaan ”Jaad”. Mid ka mid ah kooxda ayaa Ra’iisulwasaaraha geedka laamihiisa curdinka ah u diyaarinaya, isagoo caleemaha kuwooda ugu jilicsan xataa caaradaha ka guraya. Mid kale geedka ayuu inta biyo yar ku daro mooye qori ah ku tumayaa, caajiinkan waxaa la yiraahdaa ”Al-Madkuuk”. Qof walba xoogaa ayaa loo dhiibay, isna inta uu kubbad yar ka dhigo ayuu taqsiin afka ku ritaa. Dhammaantood biyo qabow ayay quluc la deebshay ka cabbayeen, waxayna u muuqdeen kuwa marqaanka taqsiinta macaan ee wanaagsan ku raaxaysanaya. Ka ma sheekayn karo dhadhanka wacan ee geedku carrigan leeyahay, marka loo dhigo kan adag ee Yaman laga beero. Yurubiyaanku marqaan yar ayay ka helaan oo saaxiibkay S.[51] iyo aniga ayaa mar isku daynay oo khasab marqaan isaga doonnay. Ha se ahaatee, Carabta oo aan sarqaanlayda iyo maandooriyeyaasha u baran waxay sheegaan in ayna marqaanka la’aanti noolaan karin, sidii dadka oobiyamka (opium) adeegsada. Waxay u egtahay in uu ka soo saaro dabeecad sidii ay ku jiraan dheelaloow, taas oo marka waqtiga iyo fogaantu ka sii babdbadiso ay dhici karto in uu isu beddelo khayaaligii qurxoonaa ee Lotuska iyo Lotus cunayaasha (Lotophagi)[52]. Culimmadu, sida Caraabiya, ayay waxay u haystaan in uu yahay ”Akl al-Saalixiin”, ama Quudka Awliyada, kuwa wax bartayna waxay sheegaan in laga helo isaga oo maskaxda ka shaqaysiiya, fikradaha daaha ka caaqo, qalbiga ka farxiyo, hurdada yareeyo, booskii cuntadana uu galo. Dadka reer Harar maalin walba waa ay cunaan, laga bilaabo saddex saac oo subaxnimo ilaa ku dhowaadka duhurka, markaa oo ay qadeeyaan dabadeedna wax ka adag oo caraq iyo miid ah ku baashaalaan.

Garaadku markii uu si edboon ii waraystay ayuu dhankiisa midig mfrishka i fariisiyay, halkaa oo aan qaat ku cunay oo tusbaxaygiina faraha la raacraacay, intii uu shaqadiisa malmeed kala hagaajinayay. Dabadeed mid odayaasha ka mid ah ayaa inta hul yar oo darbiga ah kitaab wayn kala soo baxay oo furfuray duco dheer, ama Salliga Nabiga [nnk] akhriyay. Joogsi walba dabadi dadkii joogay oo dhan waxay ka daba oranayeen ’Allaahumma salli calaa

[51] Stroyan ( ?) – *[T]*

[52] Lotus cuneyaal waa dad sheekooyinkii khayaaliga ahaa ee Giriiggii hore lagu sheegay. Waxaa la rumaysnaa in ay ku noolaayeen jasiirad Waqooyiga Africa ku taal. Geed Lotos la yiraahdo oo iyaga oo dhan in ay har iyo habeen riyo ku jiraan ka dhigay ayay aad u cuni jireen oo ku marqaami jireen. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Sayyidinaa Muxammadin, wa calaa Aalihi wa Saxbihi ajmaciin!' Hawshaan oo nus saac qaadatay ayaa ii ogolaatay in aan fursad is muujin aan aad u jeclaa ah ku sameeyo. Akhriyihii oo qalday sharrax dhinaca ku yiil ayaa yiri 'Malaa'ig, Insi, iyo Jin': Garaadkii ayaa kitaabkii qabsaday oo wuxuu ogaaday in ay ku qorantahay, 'Insi, Malaa'ig, iyo Jin'. Aragtiyaha ku aaddan sida ay makhluuqu isugu xigaan waa lagu kala duwanaaday. Markii aan sharraxay in uu ugu sarreeyo insiga oo Muslimimiintu rumaysanyihiin in *uusan* malaa'igaha wax yar ka hoosayn, maxaa yeelay waxaa laga abuuray nabiyo, asxaab iyo awliyo; halka kuwa kale ay yihiin "Wasiidho", ama xiriiriyeyaal u dhaxeeya abuuraha iyo abuurtiisa. Fiqhigaygii riyaaq siman iyo dhawr jalleecooyin rayn leh oo xagga odayaasha ah ayaan ku helay.

Markii salaaddii la tukaday ayaa gacanyarihii qasrigu Garaadka la faqay, isna inta istaagay oo tusbixiisii kuusha madow lahaa dhigtay, khadeeye soo qaatay, 'Badan' cad ama khamiis gacmagooska Carbeed shaatigiisii ka dul gashaday, mfrishkii ka hoobtay oo kabihii illaday ayuu libdhay. Muggan waxaa na loo ku yeeray in aan Amiirka la shirno. Dabadeed waxaa la ii oggolaaday in aan albaabka hore kabaha la soo galo. Markii aan, sidii hore oo kale, si maamuus leh u soo galay, ayaa Amiirkii ii ishaaray in aan ag fariisto Garaadka oo roog Beershi ah ku fadhiya kursiga amiirka midigtiisa. Labadaydii gacanyare waxay kadkdaloobsadeen dermaha iska caadiga ah ee dhulka hortayada ah yaal, xoogaana naga fog. Ka dib, markii uu xogo badan ka warsaday isbeddellada Cadan ka dhacay, ayuu Amiirkii si kedis ah warqad u soo bixiyay, oo inta si shaki leh u dhugtay iga dalbaday in aan sharraxo waxa ku qoran.

Dabadeed Garaadka ayaa i wayddiiyay in aan Harar ganacsi ka samaynayo iyo in kale. Jawaabtaydu waxay ahayd, 'annagu ganacsato ma nihin; waxaannu idiin ku soo marti galnay in aannu Amiirka soo booqano, Allaha xafidee! iyo in saaxiibtinimada labada quwadood u dhaxaysaa ay waarto'. Markii intaasi u ekaatay mid kaafiday ayaan raaciyay in ay malaha Amiirku ku rayn lahayd haddii uu dhakhsiyo noo fasaxo, maxaa yeelay hawada Harar aniga aad ayay iigu angagantahay, gacanyareyaashayduna ay khatar ugu jiraan in ay furuq markaa magaalada faro kululk ku hayay qaadaan, aniga oo si fiican u xasuusisan gacajiidka Afrika lagu yaqaan ee laba ama saddex billood ay qaadanayso in warqad laga jawaabo ama wax laga yiraahdo. Amiirkii oo hadalka aad ugu meeldayaya ayaa xaggii Wasiirka u janjeersaday, isna wuxuu aayar la soo booday; 'Jawaabta waa la bixin doonaa'. Jawaabtaa aan waafiga ahayn ayuu kulankeennii ku dhammaaday.

Imaanshahaygii wax yar dabadi ayaan mid culumada ka mid ah salaan u diray, waa Sheekh Jaamacii Bartire Soomaaliyeed e, isna wuu soo ajiibay oo isagoo xanuun ka cabanaya mar i soo booqday. Qof ahaan, wuxuu u muuqday nin madow oo ilaa afartan jira, aad furuq uu jirkiisa dhaawacay, xirribo soo kudsan leh, gar wayn, jirrkiisu simanyahay, gacmihiisa iyo cagihiisuna aad u yaryaryihiin. Wuxuu ka guursaday reer Shariif Yoonis, waxaana looga dambeeyaa in uu kasbaday xushmadda Caalim, nin nabadeed iyo Muslinnimo barax la'. Inkasta oo uusan Carabi xaaldheere qumman ku ahayn, wuxuu aad u bartay culuunta Diinta, oo waxaa la sheegay in xataa reer Maka ay xushmad ahaan gacanta ka dhunkadeen, markii u xajka tegay. Dabeecaddiisa kale guul fiican ka ma uu gaarin. Waxyaalaha ugu waawayn ee taasi dhaxalsiisay waxaa ka mid ah waran madaxa laga la haleelay iyo isaga oo guud ahaan lagu la taliyay in uu kitaabbadiisa iska akhriso oo raggaa faraha ka qaado. Haddana, mar walba "lillaahi" ayuu u shaqaynayaa. Hadal cadcaddidiisa iyo gabbasho la'aantiisa,


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

dabeecadaha ’nabaddoonka’ u gaarka ah, ayaa oggolaaday in Amiirku ka haybaysto; marar badanna hawlgallo ergo diblomaasiyadeed ah ayaa ugaasyo kala duwan loogu diray, hamuunta uu shaacbixid u qabana wali ka ma uu dhargin. Socdaalladiisa wuxuu ku bilaabay isaga oo doonayay in uu degdeg lib ugu gaaro oo uu soo dilo sarkaalka Ingiriiska Cadan u fadhiya. Markiise uu la yaabay kala dambaynta iyo garsoorka xukunkayaga ayuu ulajeeddadiisii beddelay oo sarkaalkii Islaamid u bandhigay. Si reer magaalnimo leh ayuu sarkaalkii u qaabbilay ilaa reer Barigii xumaa ee doonayay in uu Kaafirka rubadda gooyo ka noqday falkiisii uu na markan bilaabay in uu aad ugu duceeyo in uu Islaamo. Ilaa waagaa wuxuu xil iska saaray in uu isku dayo in uu gaal walba Islaamiyo; se ma maqal waligi in uu hal ruuxna ku guulaystay. Sheekha boqashadiisii hore si wanaagsan ku ma dhammaan. Wuxuu ii sheegay in Cismaaniyiintii hore ay Istambuul qabsadeen xilligii Cumar. Si ka fiirsasho la’aan ahayd ayaan taariikhdaa ugu diiday, isna wuxuu meel kaga dhaca sharaftiisa loo gaystay kaga aarsaday dooddii wadaaddada lagu yiqiin oo ah in uu igu xanto murtadnimo iyo, kaaga sii darane, gaalnimo qayaxan. Intaa waxaa dheeraa, wuxuu ii soo dhiibay kitaab ducooyin ah oo aan inta muddo saacad ah si fiican ugu akhriyay u celiyay. Taasi Sheekhii ayay aad iigu sii dirtay, maxaa yeelay ‘xaadinta’ kitaabbada waa nooc caajiska ka mid ah oo aan wali jilib culusta Bariga xaggooda looga bogin.

Intii aannu Harar joognay, beryaheennu aad ayay caajis u haayeen. Subaxii dameeraha ayaannu daajin jirnay, mukulaalaha oo sidii kuwii cadan oo kale u dhib badanna waa yurayn jirnay, quraacna waxaan u cuni jiray muufo haruur iyo kalaankal hilib lo’aad oo biyo lagu karshay ah. Waxaa si fiican noo dhaqaaleeyay nin  Suldaan la yiraahdo, Khaadim xanuunsan oo waayeel nugul ah, ka dib markii uu lix Amiir u soo shaqeeyayna qasriga in uu iska dhex joogo loo oggolaaday. Muuqaalka wax waalan ayuu uga ekaa, dhaladana waxaa u saarnaa koofiyad sunno bar cadyahay barna madowyahay, sida Maaskarada Hariyo Habeen, se dhaqankiisu waa miyir qabay. Waaberiga ayuu wuxuu noo keenaa moos bukeeni baryay, rooti qamadi ah iyo koobab qaxwe ama shaah aan nah lahayn ah. Haddana isaga oo ay la shaqaynayaan habar isaga ka sii urdufsan ayuu shiishaddiisii ii diraariyaa. Waa uunuluc laba moqor ka taaganyihiin weelkeeduna dhoobo la hogeeyay yahay. Haddana wuxuu la “naqsanadaa” gabdhaha ayooyinka ah oo shaqada la daahay, mar kale caro ayuu la qayliyaa, maxaa yeelay marti ayaa Qaat meesha ku cuntay iyaga oo aan isaga wax ka siin, ama kaadka qasriga ayay kabo la soo galeen. Dadka kale ee qasriga deggan waxaa ka mid ahaa gabdho Oromo addoomo ah oo dhib badan, gaar ahaa mid Berille la yiraahdo oo aan loo bogin, qayladaeeda dheer iyo dhaqan xumadeeduna waji xumo ku hayeen xujayda iyo Muslimiinta dhawrsan.

Markii ay laba saac oo subaxnimo ahayd, ayay Soomaalidii noo keeneen hadiaydo isugu jiray liin macaan, moos bukeeni, khasab, liin dhanaan, rooti qamadi iyo hilib digaag kalaankal ah. Isla markaana, marti Harariyiin iyo kuwo kale isugu jira oo Suldaan caafimaadkiisa warsanaysa ayaa gurigii afka soo buuxisay. Duhurka badanaa waxaa ka dambeeya xooga nasasho ah oo dadku inta qadeeyaan xooga qayluushadaan. Waxaa mar kale jikada Amiirka na loo ka keenay rooti iyo hilib lo’aad. Galabkii ayaa haddana gurigii la soo buuxiyay, ilaa martidii ay cashadii u kala dareereen. Intii aan gabbalku dhicin ayaannu ka taxaddari jirnay in aan ardaaga dameeruhu ku xiranyihiin soo fiirinno, maaddaama aysan si fiican u dheregsananyn oo si joogto ah isugu dayaan baxsi.


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

Harar waxay ku jirtay xilligii beeruhu soo go'ayeen oo hawshiisu aad nooga jajabisay booqashada. Subixii, Amiirka oo ay galbinayaan afartan ilaa konton waardiye ayaa buur xagga waqooyiga magaalada ka xigta u koorasyta, halkaa oo uu ku soo kormeero gurayaashiisa iyo finjileyaashii Oromada. Raaggaa, habeen walba meesha aannu degganahay ayaa hilib, biir iyo miid[53] lagu sooraa. Khamrooyinkan calculus ayaa muranno badan dhaliyay, annaguna waxaan isku daynay in aan canaananno cawaanta oo dad wanaagsan ka soo saarno, waa se ku guuldarraysannay, aan taa qirtee. Casariyeheennii waxaan ku idlaysannay in aan isaga dambaynno canaanta Oromada. Waxa aan naga maqnayn'xifaalalow Saciid Waal oo, in kasta oo uu toddobaatan jiro, wali badawi waynoo caafimaad qaba, af xumo iyo cayna ku darsaday oo gabdhaha addoomaha ahna la murma. Berille carrabdheer ama Aamina Bilan ayaa ku cariiqsata in faynuusta xaydha ku shaqaysa ay damiso inta aan la seexan wax badan ka hor, ama qolka ayay soo galaan iyaga oo heesaya, qoslaya, ciyaaraya ama sacabba tumaya; markaa oo Suldaan uu kaga sii daro oo sidii dhurwaagii u qayliyo. Mararkan oo kale dibadda ayaan canaan caro leh u la cayrinnaa ardaasha caddaysatay. Hal mar ah ayay dibaddii wada aamustay. Ma se sii ahaan, xaggii gudaha balaa ka taagan! Saciid Waal ayaa si laga baqo u khuuriya, Abtidoonna habeenkii oo dhan wuxuu la sheekaystaa badawiyiin casho soo doontay. Sariiraheennii adkaa habeen ama cœnœ deorum midna ku ma aannaan ladin. Caajiska isbeddel l'aanta maalmahaas waxaa noo weheliyay tasbiixsi tiro badan, ka faashiga faalallowyada iyo dhegaysiga warar iyo kutirikuteen ay sidii Soomaalidu noogu daldalaysay aan dhammaantayo yaa mar uun idinka joojiya is niri. Garaad Maxamad oo ay Habar Awashii diradireen ayaa xuraansigiisa aniga igu saabsan ku dheeraaday. Odayga khaa'inka ahi wuxuu maqlay in aan Yawmul Qiyaame uga nimi Garaad Aadan, qalbigiisiina wuxuu is tusay khayaaliga ah in Xaaji Sharma'arke oo Harar ilmaha lagu seexiyo uu na soo dirsaday. Waxaa malaha xaalkeennii meel la saaray markii uu yimi barbaar jilibka Cayaal Gadiid ah oo soo sheegay in saddex walaalo ahi ay dhulka Soomaaliyeed ka soo degeen, laba ka mid ahina ay Berbera ku dhererayaan in uu kii saddexaad Harar ka soo laabto, oo inkasta oo ay dhar Muslim xiranyihiin ay dhab ahaan rag Ingiriis ah oo dawladdu soo dirsataty yihiin. Riyooyinka lagu taamayo safarro la leexsado ayaa si fiican u soo xoogaystay. Habar Awashii sirtoodii bannaanka ayay soo dhigteen, Garaadkana waxay ka geyn wayday in uu siyaasad reer magaal dego, isla markaana uu martidiisa khatarta ah la xaalo.

Maalmo ka dib booqashidiisii hore, ayuu Sheekh Jaamac inta Xammaali u yeeray oo u sheegay safar uu rabo in uu Harar kaga baxo. Saaxiibkay ayaa u sheegay in laga yaabo in aannu ba sii galbinno. Sheekhii wacnaa wuxuu ku yaboohay in uu Garaad Maxamad fasax ambabax ka dalbayo; se markii uu wasiirkii guriga ka soo waayay ayuu nagu la ballamay in aan qasriga berri ku la kulanno, xilliga qayilaadda loo fadhiisanayo. Wax badan ayaannu ku hungownay rajooyin aannu ka qabnay 'caamo'e, tii ugu dambeysay ayaan iyana wax badan laga filan. Ha se yeeshee, 12 saac aroortii ayaa dhammaan na loo wada yeeray, oo inta qolkii qaabbilaadda ee Garaadka galnay, sidii ay ahaan jirtay, si wanaagsan na loo qaabbilay. Waxaa ii baxay waxa uu la xanuunsanyahay in ay oofwareen burunkiito ku raagtay tahay. Markaas ayaan anigoo go'aansaday in aan xusuustii ugu dambaysay ku reebo u sheegsheegay

[53] Waa 'Tej'ka Xabashida. Harar waxaa laga sameeyaa malab xoogaa biyo kulul ah lagu barxay. – *[B]*


Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved

calaamadaha lagu garto oo ballanqaaday markii aan Cadan gaaro in aan u soo dhiibo dawooyinkayaga kala duwan ee  aan adeegsanno. Wuxuu ku dhegay rajada ah in uu mar uun ka bogsado xanuunka, halka dadkii qasriga fadhiyay ay la dhacsanaayeen ayna iga baryeen in aan ku soo dhakhsado. Haddana Amiirkii ayaa Garaadka u yeeray, daqiiqado yar dabadoodna waa raacay, anigoo markan kaligay ah. Halkaa waxaa nagu dhex maray waraysi dheer oo Cadan, Saylac, Berbera iyo Istambuul ku saabsan. Amiirku su'aalo badan ayuu Caraabiya iyo wax walba oo laga helo iga wayddiiyay. Jawaabtu waxay ahayd in dan ganacsi ay maanta dhagaxaa tiiraanyo nagu xukuntay. Oraahyo soo jiidasho leh ayuu u adeegsaday jeclaanta uu u qabo saaxiibtinnimadayada iyo xushmadda wayn ee uu u hayo dadka sida uu fahansanyahay maraakiibta waawayn dhisay. Fursaddii ayaan qaatay oo erayo aan ka fiirsaday Harar ku ammaanay aniguna, gaar ahaanna in aan ka xumahay bunkeeda oo aysan Faranjidu garanayn. Ninkii barta yaraa ee wajiga duubnaa wuxuu dhoollo caddeeyay imminka, sida Muslimiintu yiraahdaan, waa "dhoollacaddayntii Cumar"[54].

Markii aan arkay sunniyihiisa oo markii ugu horraysay dabcay, ayaan u sheegay in illow aan hadda caafimaaday uu na fasaxo, si aan Cadan u aadno.  Hawraar san ayuu madaxa u ruxay, Garaadkiina warqad ayuu qoray ku socota Xafiiska Siyaasadda oo ammaan badani la socoto, igana codsaday in aan geenyo hadiyad ah ka geeyo. Dabadeed, inta istaagay ayaan maray duco yar oo nuxurkeedu ahaa in Amiirka cimrigiisa iyo xukunsiisu ba ay carriga ku raagaan, cadawgiisana wajiyadoodu aakhiro iyo adduunba gubtaan. Dabadeed, inta gacanta ka dhunkaday ayaan iska tegay. Markii aan qolkii qaabbilaadda ee Garaadka ku noqday, saansaanta labadaydii gacanyare waxaan ka gartay in ay aad uga walwalsanaayeen kulanka. Aniguna waxaan si hoose ugu laabqaboojiyay erayga 'Achha[55]'- "waa hagaag!"'

Markanna waxaa yimi Garaadkii oo ay weheliyaan laba nin oo hubkii shaqaalahayga iyo bastooladdii aan Amiirka u sii dhiibay sida. Tani waxay ahayd fajaciso. Waa ay iska caddayd in aysan suuragal ahayn in hadiyad lala noqdo, taa oo ay weheliso shaki aan ka qabay xuuraansi uu ku baarayo halka uu iga joogo; sida kale haddii la yeelo, waa baaqasho la hubo. Garaadka waxaan u sheegay in hubkaa gaar ahaan loogu talo galay in uu Amiirka cimrigiisa dheereeyo, oo si aan uga sii dhaadhiciyo si isdabajoog ah keebka u tuujiyay, taasoo argagax daran ku ridday madaxdii meesha fadhiday. Wasiirkii sarreeyihiisii ayuu ku noqday oo dedeg uga keenay warka ah in maalin ama laba dabadood baqal kale la i siin doono. Inta u mahadceliyay ayaannu kacnay, Garaadka u ducaynnay, shirkii macasalaamaynnay, oo annaga oo faraxsan tagnay. Farxad darteed ayuu Xammaali af Ingiriisi jajab ah daaraddii Amiirka kaga torogtorogsiiyay.

Gurigii marka aannu ku soo noqonnay, waxaan ugu nimi mudanihii Sheekh Jaamac ahaa oo aannu warkii gaarsiinnay, mahad badan oo caawimaaddiisii saaxiibtinnimadu ku dheehnayd aan ka celinnayna u raacinnay. Waxaan si fiican isugu dayay in aan ka qaboojiyo caradii taariikhda Turkiga ku saabsanayd, waana  ku guulaystay. Inta furfurmay ayuu wuxuu ii

[54] Waxaa la sheegaa in Khaliif Cumar [Arn] uu mar qura qoslay mar qurana ooyay waligii. Marka uu qoslay waxay ahayd mar uu soo xasuustay waa uu cunay ilaahiisii oo timir ka samaysnaa, xilligii jaahiliyada. Marka uu ooyayna waxay ahayd mar uu soo xasuustay isaga oo nolol-aasaya, sida Carabtii Cawaanta ahayd caadada u ahayd,  ilme gabar uu dhalay ahayd, iyaduna isla markaa ay garka ciidda uga jafayso.  – *[B]*
[55] Erayga asalkiisu waa Hindi. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

sheegay in ulajeeddadii saxda ahayd ee booqashadiisu ay ahayd codsi ka yimi dawladda, maaddaama lala socodsiiyay in aan ahay nin shimibiraha cirka ka soo rida, dadkuna ay dareen wayn ka qaadeen ulajeeddadiisa uu magaalada u yimi. Goor uu nala fadhiyo ayaa Kabiir Khaliil, mid ka mid ah culimmada waawayn, iyo Xaaji Cabdullaahi, sheekh caan ah oo riyooyin wanwanaagsan noogu riyooday, ay salaan direen. Markani waxay ka mid tahay marar badan oo intii aan Bariga joogay sababtay in culimmada oo saamaynta ay dadka ku leeyihiin, marka aan cunsurunimo eexin, uu wanaagsanyahay oo aan mahadiyo. Habeenkii, Soomaalida oo nabadgelyada weheliyeyaashayda ka walwalsanaa farxad wayn ayaa ka muuqatay. Waxay martida u keeneen hadiyado ka kooban go'yaal Harari, hilib digaag, liin iyo muufo qamadi ah.

Janawari 11, Garaadka ayaa ii yeeray oo baqalkii labaad ii siisay. Duhurkii waxaa na soo booqday Sheekh Jaamac oo falanqayn dheeyr oo Suufiyada[56] ku saabsan dabadeed igu casumay in aan kutubtiisa arko. Markii salaadda duhur la tukaday ayaan gurigiisii oo bartamaha magaalada ku yiil u lugaynnay. Guriga daaraddiisa waxaa ku yaal 'Gay Humburti', dhagaxii taariikhiga ahaa ee la sheego in Wali Nuur uu ku la kulmay Nabi Khadar [nk]. Dabadeed, markii uu sheekhu na fariisiyay qol cabbirkiisu 10 cagood oo laba jibbaaran yahay oo culimmo iyo kitaabbo waawayn oo boor lehi ka buuxaan, ayuu bilaabay in uu kor u akhriyo tacliiq dheer oo ku saabsan abtirsiinyaha Grand Masters. Wuxuu kale oo iga tusay nus darsan ah sadarro ku saabsan caqiidooyinka madaahibta kala duwan. MS[57]ka kaliya ee meesha yiil wuxuu ahaa nuqul wacan se duqoobay oo Qur'aan ah, Qaamuuska iyo Saxaaxuna waa yiilleen[58], se wax qurux iyo wanaag la sheego ah ma lahayn. Kutubta Harar badanaa waa kuwo duqoobay, maaddaama madbacaduu ay aad dhif u yihiin, qaradooda waawaynn ee afargeeska ahina waxay aad ugu dhowdahahy Kuufik[59] shaqallo leh oo aan Nuskhiga qurxoon ee casriga ah ahayn. .Ha se yeeshee, jaldiyada aad ayaan u jeclaystay. Dal Bariga ku yaal, marka laga reebo Beershiya, oo adayga iyo muuqaalka kaga fiicani ma jiro.

Sheeko qubane ah dabadeed, ayuu Sheekhii qol gudaha ah noo kaxeeyay, ama aan iraahdee qoqob mugdi ag oo maktabadda laga gooyay. Markaa ayuu noo qaybshay cunnadii caadiga ahayd ee hilib lo'aad oo karis ah, muufo haruur iyo basbaasguduudka ka koobnayd. Markii aannu maktabaddii ku soo noqonnay ayaannu ka dib xoogaa sii fadhinnay, dabadeedna waa soo baxnay oo u sheegnay in aannu ku qasbannahay in aan Garaad Maxamad booqanno, illeen reer Barigu waa dhif in ay qadada ka dib wax badan sii fadhiyaan e. Wax la sheegaa ma dhicin intii aannu ku jirnay booqashadii ugu dambaysay ee aannu wasiirka ugu tagnay. Wuxuu iga baryay in aanan hilmaamin dawooyinkiisii, marka aan Cadan tago. Waxaan u sheegay in aannu dibudhac la'aan berri dhaqaajinayno, salaadda Jimcaha ka dib. Wuxuu aayar la soo booday, ' waa hagaag, haddii Rabbi idmo!' Intii aannaan gurigiiba soo gaarin ayaa daruuro ilaa duhurkii soo yeeyelanayay ay roob culus iyo onkod buuraha kaga gariiriyay ka wareegeen.  Habeenkaa waxaan isku dhaafinnay  iyada oo ay na hareeraysay Soomaalidii oo

[56] Hooyada reer Bari ee Free-Masonry. – *[B]*
- *Freemasonry* waxaa la yiraahdaa urur dunida meelo badan siyaabo kala duwan uga jira oo ay isku bahaysteen xirfadlayaasha aqoonta dhismaha dhagaxa iyo wixii la halmaala ku shaqaysta. Waxaa lagu sheegaa urur asraar badan iyo curraafaysi mug leh ku dhaqma. – *[T]*
[57] Memoriae sacrum (xus ama qoraal barakaysan). – *[T]*
[58] Laba qaamuusyo Carabi ah oo la jecelyahay (Qaamuus iyo Saxaax). - *G. W.*
[59] Far Carabi ah oo waayo sii horreeyay kutubka Qur'aanka lagu qori jiray. – *[T]*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**

warqado iyo farriimo badan Berbera noogu dhiibayay. Taladayadu waxay ahayd in aannu Jimcaha subax hore ka fuullo. Se, markii aannu soo toosnay baqal ayaa naga maqnaaday, la ma na soo helin ilaa saacado ka dib. Duhurka ka hor ayuu Sheekh Jaamac noo yeeray oo sheegay in aan ambabaxno maalinta ugu habboon oo Isniinta ah. Inta uu war nagu dirqiyay ayuu sidaa safarkii maalinta Jimcaadna kaga dayrshay. Dabadeed, inta istaagay ayuu bixid u holladay, xoogaa duco ah nagu tufay, noogu na duceeyay in aan balaayo na arag. Mar kale ayuu Isniin ku taliyay, ballanna qaaday in uu Wilensi nagu la kulmayo, wax walba oo dhaca.
Waxaan ka baqayaa in Shiikha taladiisa markan ay u badantay in aan dheg jalaq loo siin. Alaabadayadii iyo shaqaalahayagii ayaannu laba toddobaad oo dhan ka maqnayn. Dadka reer Harar waxay caan ku yihiin isrogrogga, ma na garanaynno waxa berri maskaxda Amiirka ka iman kara. Dhab ahaantii, magaalooyinkan Africa oo dhammi waa uun xabsiyo waawayn oo aad kaskaaga ku soo gasho, sida maahmaandu tiraahdana aad kaga baxdo kaska qof kale. Si ay ahaataba, markii salaaddii masjidka laga baxay ayaa mahiigaan roob iyo dabaylo cir iyo dhul ahi sabir na badeen. Gammaankeennii ayaan seetaysannay oo, annagoo aan doonayn, amabaxeennii subixii xigay u dib dhigannay.

La soco cutubka xiga.
Mahadsanidin

Tarjumo & Tifaftir Boodhari Warsame
Email: Bodhari.warsame@gmail.com

_________

*Boodhari waa qoraa tarjumay ama gacanta ku haya buuggaag badan oo qiimo taariikheed ku leh Soomaaliya. Waxa uuna si joogto ah qoraaladiisa ugu soo ban dhigaa degelka WardheerNews*


**Copyright © 2016 WardheerNews, All rights reserved**